Barashada

Af Soomaaliga

Cabdiraxmaan 'Guri Barwaaqo'
iyo
Maxamed Caddaani

Hargeysa, 2016

Copyright © 2014 by A.A.Farah " Guri **Barwaaqo**
"& Maxamed Caddaani Yuusuf

All rights reserved

No part of
this book
may be
reproduced in any form
or by any means, eletronic or
mechanical, including photocopying,
recording,
or by any information storage and retrieval
system, without written
permission
from the
Copyright owner.

TUSMO

1.0. Aqoon-Afeedda (Linguistics): Horddac Kooban.....4

1.1. Af-yaqaan (Linguist).....4

1.2. Ereyga af iyo taabudnimadiisa.....4

1.3. Afka maxaa af loogu bixiyey?.....4

1.4. Af waa maxay?.....5

1.5. Ma dadka ayuun baa hadla? Mise Noolaha kalena way hadlaan? 5

1.6..... Afka duunyada:.....5

1.7. Afka shinnida iyo ka qudhaanjada.....6

1.8. Noolaha kale afka dadka ma baran karaa, dadkuse afka noolaha kale ma baran karaa? 6

1.9. Daayeerrada iyo barashada afka.....7

1.9.1. Luella & Winthrop Kellogg -1930dii:.....7

1.9.2. Catherine & Keith Hayes -1940dii:.....7

1.9.3. Beatrix & Allen Gardner:.....8

1.9.4. Kala duwanaanshaha afka dadka iyo ka duunyada.....8

1.9.5. Afkii u horreeyey ee adduunka lagaga hadlay iyo ka loo malaynaayo.....9

2.0. Sooyaal afeedda (Historical Linguistics).....11

2.1. Sida ay afafku u beddelmaan iyo sida lagu ogaaday xidhiidhada ka dhexeeya 11

2.2. Qofkii u horreyey ee ogaaday xidhiidhka ka dhexeeya afafka. 13
2.3. Xidhiidhkii iyo aragtiyaha uu Sir William Jones soo bandhigay 14

2.5. Xubnaha Qoyska Kushatigga.....17
3.0 SOOYAALKII QORAALKA FAR SOOMAALIDA.....19
4.0 Barashada afafka iyo sida loogu kala qaybsan yahay.....20
4.1. Aragtida Dr. Ferdinand De.....Saussure20
4.2. Aragtida Noam Chomsky.....20
4.4. Barashada Af Soomaaliga.....20
5.0 ABLA ABLAYNTA AF SOOMAALIGA.....22
5.1. Hunnuuhunnuu.....22
5.1.1. Higgaadda.....23
5.1.2. Alan.....24
5.1.3. Alanka iyo Dhismihiisa:.....24
5.1.4. Dhismaha alan shaqal dheer leh.....25
5.1.5. Dhismaha alanku marka aanu.....26
xag lahayn.....26
5.1.6. Qaab dhismeedka erayga ‘Alan’ qudhiisa.....26
5.2. Qodobbada.....28
6.0 Qaab Dhismeedka Hadalka.....30
6.1. Hal.....30
6.1.2. Taabbudnimada Ereyga Magac iyo Adeegsigiisa.....37
6.2. Hawraar.....44

l.O. Aqoon-Afeedda (Linguistics): Horddac Kooban

Sida ay aqoonyahannada aqoon-afeeddu yidhaahdaan, aqoon-afeeddu waa barashada si xeel-dheeriya oo cilmiyaysan loo barto afafka.

1.1. Af-yaqaan (Linguist)

Waa qofka barta Aqoon-Afeedda, waxaana lagama maarmaan ah in uu xeel- dheerahaasi yaqaano ugu yaraan laba af iyo wax ka badan.

l.2. Ereyga af iyo taabudnimadiisa

Waa eray ka kooban laba xaraf oo leh dhawr ujeeddo. Haddii aan wax ka tilmaanno, tusaale ahaan, mar waa xubinta uu nooluhu wax ku cuno. Mar kale, waa wax kasta oo gudo leh halka wax lagaga shubo. Mar saddexaad waa dhanka uu wax kasta oo wax gooyaa wax ku gooyo. Mar afraadka waa hadalka ay bulsho meel ku wada dhaqani adeegsato, iskuna af garato. Midda aan halkan kaga hadlaynaana waa ujeeddadan dambe. Sidaasi awgeed, barashada afku waa wax qiimo badan. Sida ay xeel-dheerayaasha afafku sheegeenna inta aad hadba afkaaga ka taqaaanno (ka baratid) ayuun baad ku fekeri kartaa, af kalana ka baran kartaa. Intaa in ka badanna ma awoodi kartid.

i. Tusaale ahaan markaad ka fikirto geel maxaa maskaxdaada ku soo dhacaya? Waxaa ku soo dhacaya: hal, awr, qaalin, qurbac, nirigo, baarqab, koor, iwm.

ii. Tusaale kale haddii aad ka fekerto caws, waxaa kugu soo degdegaya doog, dixi, naq, dareemo, caws-gogol, timo-naagoodle, caws=gorof, iwm.

l.3. Afka maxaa af loogu bixiyey?

Lama sheegi karo, sida ay ila tahay, markii u horreysey ee uu eraygu ujeeddooyinkii aan sheegnay yeeshay iyo sida ay u kala horreeyeen.

Hayeeshee, dadka qaar baa qabo in sababtu tahay in afku yahay meesha ay ka soo baxaan codadka ama dhawaaqyada hadalku, sidaana loogu bixiyey.

Si kasta ha ahaatee, kala geddisnaanta dhawaaqyada waxaa samayntooda qayb weyn ka qaata sambabada, doobta, dalqada, qalaanqulshaha, dhanxanagga, ilkahaha, carrabka, dibnaha iyo hanqalaalka (sanka).

l.4. Af waa maxay?
Af waa baaq codeed oo xambaarsan ujeeddo qeexan oo la isku af-garto (Mario pei 1928). Afkastana waxa kuwada hadla laba qof iyo ka badan oo aragtiya hoodana isku waydaarsada.

l.5. Ma dadka ayuun baa hadla? Mise Noolaha kalena way hadlaan? Warcelinta weydiintaasu waa haa oo dadka iyo duunyada kalaba way hadlaayn. Hadalkooduse waa kala jaad ama way kala duwan yihiin.

l.6. . Afka duunyada:
Dhaqan kasta waxa laga helayaa ama laga helaaba, sheekooyin sheegaya duunyo wada hadashay, ama wax wada qaybsatay. Tusaale ahaan waxay Soomaalidu ka sheekaysaa sheekada ‘qayb libaax’ ee uu dugaaggu hasha ku qaybsanayo. Markii arrintaasi loo kuurgalay baadhitaanna lagu sameeyey waxa la ogaaday iney duunyadu af leedahay.

Gaarriye oo arrintaa wax ka tilmaamaya ayaa yidhi:
Caalinow ta' iyo wow

Bal tixraac halkaan
maro Tukayaasha
duulaa Warka waysu
tebiyaan
Waa aftahan qudhaanjadu*

Geeluna tawaawaca
Kolka biyaha loo tubo
Ways tibaax
yaqaannaa Taaha
adhigu waa hadal
Urta waysku tooydaa

l.7. Afka shinnida iyo ka qudhaanjada

Noolaha kale kolka laysku daro waxa ugu af wanaagsan Shinnida. Baadhitaan la sameeyey, tusaale ahaan, waxa lagu ogaaday in shinnidu si wacan u wada xidhiidho oo ay tilmaami karto meesha ay dhabaq ku soo aragtay, sheegina karto inta uu dhabaqaasi u jiro. Hayeeshee aanay sheegi Karin xilligii ay soo aragtay.

*Qudhaanjadu inay hadasho Quraankaa lay noogu sheegay hayeeshee, ilaa hadda wax baadhitaan ah oo lagu sameeyey oo lagaga waxa uu afkeedu kaga duwan yahay ka dadka iyo ka duunyada ma ogi anigu.

l.8. Noolaha kale afka dadka ma baran karaa, dadkuse afka noolaha kale ma baran karaa?

Dad badan isweydiiya, qaar kalana waabay rumaysan yihiin in dadku afka noolaha kale sida ka waraabaha, dacawooyinka, libaaxyada ama adhiga iyo geelaba la baran karo. Ama sida kale in noolaha kale baran karo afafka dadka.

Runtii afafka dadku in kasta oo ay oogada ku kala geddisan yihiin haddana wax badan bay iskaga mid yihiin. Qof kastaana afkii uu isyidhaa baro wuu baran karaa. Taasi oo ay ujeeddadu tahay

afkasta oo adduunka jira (waa ka dadkee) waa la baran karaa. Hayeeshee, dadku afka duunyada ma baran karaan, duunyaduna afka dadka ma baran Karaan.

Si midhkaa loo ogaado ayey aqoonyahanno badani sameeyey shirrabaado kala duwan. Tusaale ahaam:

l.9. Daayeerrada iyo barashada afka

Aqoon baadhayaal dhawra baa xilli badan u huray si ay daayeerka loo yaqaan '*chimpanzee'* u baraan afka dadka. Hayeeshee laguma guuleysan. Tusaale ahaan:

l.9.l. Luella & Winthrop Kellogg –l93Odii:

Baa 1930-yadii daayeer dhal ah oo ay u bixiyeen '*Gua*' la koriyey wiil yar oo ay dhaleen. Gua- waxa uu bartay (ama fahmi karayey) 100 eray oo qudha, qaar cusubse muu samayn karayn.

l.9.2. Catherine & Keith Hayes –l94Odii:

Lammaanaha ay magacyadoodu kor ku xusan yihiin baa 1940-neeyadii daayeerad yar oo la yidhaa (Viki) u koriyey sidii ilmo dad oo kale.

Shan gu' baanay ku qaadatay isku day goodii ahaa inay ku dhawaaqdo ereyo af Ingiriisiya, ayaga oo isku dayey inay qaabeeyaan afkeeda sidii ay u samayn lahayd dhawaaqyo.

Ugu dambayntii waxay si qaab daran ugu dhawaaqday ereyada *mama, papa*, iyo *cup.* Arrintani waxay ahayd waxqabad qiimihiisa leh. Waxaana caddaatay in noolaha kale aanu run ahaantii lahayn marin codeedka ku habboon samaynta dhawaaqyada loo adeegsado hadalka. Sidaasi darteed jaadadka daayeerrada loo kala yaqaan Apes & gorillas, oo sida chimpanzee-ga leh dhawaaqyo farabadan oy ku wada

xidhiidhaan, ma samayn karaan codadka ama dhawaaqyada hadalka dadka.

l.9.3. Beatrix & Allen Gardner:

Labadaa aqoonyahan baa ayana daayeerad la yidhaa ‘Washoe’ u koriyey sidii ilmo dad oo kale. Waxaanay bareen sidii ay u adeegsan lahayd farta ay dadka dhegaha culusi adeegsadaan ee loo yaqaan ASL. Fartaasi oo ay carruur badan oo dhego culusi u baratay sidii afkooda hooyo oo kale.

Saddex gu’ iyo badh gudahood, waxay fartaa ku adeegsatay in ka badan 100 erey. Tusaale ahaan, baby, banana, window, woman, you, etc. Waxa kale oo ay awood u yeelatay inay ereyo isku darto si ay weedho u samayso sida: *more fruit/ open food drink*. Waxa kale oo ay samaysay weedho kooban sida: *water bird = swan* -(productivity).

l.9.4. Kala duwanaanshaha afka dadka iyo ka duunyada

I. Amminle (Displacement): 1. Afka dadku waa amminle (waawuxuu leeyahay wakhti).Dadku waxay ka falnqeeyaan wax jooga (joogto), waxay ka hadlaan dhacdo mar hore dhacday (tagto), waxaanay odorosaan wax soo socda (ka hadlaan timaado). 2. Afka duunyaduse <u>amminle ma aha</u>.

2. Guddoonsi (Arbirary): Dadku afka kuma soo dhasho ee wuu bartaa, halka ay duunyadu ku soo dhalato inta ay isku af gartaan.Ereyada iyo waxa ay sheegaan isuma eka ee lagu heshiiyey. Tusaale ahaan erayga ‘ey’ (Soomaali), ‘dog’ (Ingiriisi) iyo ‘ ¹ ’¹ (carabi) midna uma eka waxa uu tilmaamayo ee ay ujeed-dadiisu tahay. Waxaa jiro eray gaar ah ama tirsan oo aan badnayn oo ay dhawaaqooda iyo ujeeddooyinkoodu isku mid yihiin sida: Digdig, qabqab, wacwac, bacbac, iwm.

3. Hadal tirado (Productivity): Af kasta Higgaaddiisu way tirsantahay. Tusaale ahaan, higgaadda af Soomaaligu waa 32 xaraf. Hayeeshee, waxa buugaag maanta qoran ama waxa maansooyin la tirshay waxay ka koob

yihiin 32kaa xaraf. Af Carbeedka higgaaddiisu waa 28, ka Ingiriiskuna waa 26. Sidaasi oo ay tahay dhawr-iyo-labaatankaa xaraf ayaa hadalka ku qoran malaayiinta buug ee af Carabiga iyo af Ingiriiska ku qorani ka kooban yahay.

4. Dhaqan gudbin (Cultural transmission): I. Dadku muqa way kala dhaxlaan, afkase ma kala dhaxlaan ee way bartaan, isagaanay dhaqanka isugu gudbiyaa. 2. Duunyadu way ku soo dhalataa inta yar ee afka ah ee ay adeeg sato.

5. Laba codayn (Duality): I. Higgaadda afka dadku ujeeddo ma laha. Tusaale ahaan, xarafyada ‘a, b, iyo d’ midna iskii macno uma laha. Hayeeshee kolka la isku geeyo waxaa inoo soo baxaya erayda ‘*bad*’, iyo ‘*dab*’ oo uu mid kastaa ujeeddo gaar ah leeyahay. 2. Afka duunyadase lama kala jejebin karo oo ma laha laba codayntaasi. Tusaale ahaan, cabaadka ama ololka hasha lama higgaadin karo (xuruuf lagama dhigi karo), erayana lagama abuuri karo.

6. Mardimayn(Patterning) :Afka dadku wuxuu leeyahay qaab la raaco ama loo qaabeeyoxarfihiisa iyo erayadiisaba, ka xooluhuse ma laha. Tusaale ahaan. Xuruufta A, b, o, d: waxaa loo qaabayn karaa sidan: *Abdo, dabo, bado*.Lama odhan karo: ‘Aobd’. Sidaa si la mid ah ayaa weedhahana loogu qaabayn karaa:

- Tuuggaa xoog u hindhisay (suuragal)
- Tuuggaa u hindhisay xoog (suuragal)
- Xoog tuuggaa u hindhisay (suuragal)
- Tuug xoog hindhisay u gaa (suuragal maaha)

l.9.5. Afkii u horreeyey ee adduunka lagaga hadlay iyo ka loo malaynaayo Qarnigii 15aad ayaa mahadho-yaqaan Giriiga oo la

odhan jiray *HERODOTUS* uu soo weriyay in farcoonnadii masar mid ka mida oo la odhan jiray

PSAMMETICHUS inuu isku deyey inuu ka lib keeno arinta ah sida uu ku ogaan lahaa afkii u horreeyey ee adduunka laga hadlo.

Laba carruura ayuu boqorku go'doomiyey oo uu buul uga dhisay meel taag ah oo cidlo ah. Waxaanu amray in laba addoon oo dhegali'i wax siiyaan oo ay eraykoriyaan. Muddo ka dib eraygii ugu horeeyay ee ay ku hadaaqeen wuxuu noqday erayga '*Bekos*' kaas oo afka *phrygain*-ka la ujeedo ah muufo (Khamiir). Afkaasi oo hadda lagaga hadlo gobolka woqooyiga bariga ee dalka Turkiga loona yidhaa *Phrygia*.

Badi afafka adduunka lama yaqaan sidii ay ku abuurmeen ama ku dhasheen, lamina oga xilligii lagu hadlay iyo ciddii u horreysey ee afkaa ku hadashay ama adeegsatay. Hayeeshee, waxaa jira dhawr af oo fara-ku-tiris ah oo la yaqaan sidii ay ku abuurmeen. Tusaale ahaan haddii dad kala afaf ahi is dhexgalaan waxa ka dhasha wax aan af lagu sheegi Karin oo ka kooban afafkii ay isula yimaaddeen. Carruurta ay dadkaasi iska dhalaan waxay ka barataa oo ay hadhaw ku hadlaan af aan naxwe lahayn kaasi oo la yidhaa *PIDGIN*. Faca facaa ka dambeeyaa am aka dhex samay-sma afka hab-dhismeed sax ah leh oo si kasta u dham-maystiran kaasi oo loo yaqaan *CREOLE. Sidaasi daraaddeed a*fafku way dhashaan waanay dhintaan.

Ummadaha adduunku erayada way kala amaahdaan, is dhexgal kaana sababay. Waxaanu ku yimaaddaa:

1. Hab dhaqan-dhaqaale.
2. Hab diineed.
3. Hab gumaysi,

balse waxaan ogsoonaay in aan, inta badan, isbedeli ku dhicin erayada:

1) Xubnaha jidhka
2) Tirada

3) Dhulka
4) Cirka, iyo
5) Badda

Inkasta oo uu innaga isbedelay magaca weji oo ahaa fool . Tusaale: fool-xumo, fool-dhaq, fool-tub, iwm

2.O. Sooyaal afeedda (Historical Linguistics)


2.I. Sida ay afafku u beddelmaan iyo sida lagu ogaaday xidhiidhada ka dhexeeya

Gasiirad ay deggen yihiin reer. Aan reerkaa u bixinno tusaale ahaan ‘Reer Galool’ afkoodana aan u bixino ‘Sako’




Gasiirad dhan walba badi kaga wareegsan tahay

Gasiiraddan ay ‘**Reer Galool**’ deggen yihiin waxa ku yaal:




A. Reer Galool badh ka mid ah baa buuraha ka gudbay




B. Badh kalana webiga ayuu ka tallaabay

Badhkii buuraha dabadooda ku go'doomay dhawr boqol oo gu' ka dib afkoodiii wuu isbeddeley. Waxaanu noqday af la yidhaa ‘**Teke’**



Badhkii aan doolin qudhooda afkoodii waxa ku dhacay isbeddel waxaanu noqday af la yidhaa **‘Saka’**



2.2. Qofkii u horreyey ee ogaaday xidhiidhka ka dhexeeya afafka

Ninkii ogaaday xidhiidhkaa waxa la odhan jirey Sir William Jones. Waxaanu u dhashay dalka Ingiriiska. Markii uu helay aragtidaasi waxa uu joogay ama deggeenaa dalka Hindiya. Waxaanu ka ahaa garsoore. 1780kii baa loo diray dalka India. Wuxuu aqoon fiican u

lahaa afafka ‘*Giriigga*’ iyo ‘*Laatiinka*’. Intii uu joogay buu ku da-daalay inuu si fiican u barto af la yidhaa ‘*Saniskrit*’. Waxaanu helay jiritaanka xidhiidh ka dhexeeya afka *Saniskrit*, *Giriigga* iyo *Laatiinka*.

Bishii Feb. 2dii, 1786kii buu soo bandhigay aragti yaab badan oo tilmaamay

-sa in xidhiidh ka dhexeeyo afafka ‘*Saniskrit*’, ‘*Latin*’ iyo ‘*Greek*’.

Tusaale ahaan:


2.3. Xidhiidhkii iyo aragtiyaha uu Sir William Jones soo bandhigay

Meaning:	Sanskrit	Latin:
"three"	trayas	tres
"seven"	sapta	septem
"eight"	ashta	octo
"nine"	nava	novem
"snake"	sarpa	serpens
"king"	raja	regem
"god"	devas	divus ("divine")


"father"	"brother"
o pitar (Sanskrit) o pater (Latin) o pater (Greek) o padre (Spanish) o pere (French) o father (English) o fadar (Gothic)	o bhratar (Sanskrit) o frater (Latin) o phrater (Greek) o frere (French) o brother (Modern English) o brothor (Saxon) o bruder (German)

o faair (Old Norse) o vader (German) o athir (Old Irish-- with loss of original consonant)	o broeder (Dutch) o bratu (Old Slavic) o brathair (Old Irish)

Sir William Jones waxa uu helay, in kasta oo aanu markaasi garanayn, jiritaanka af ay afafkaasi ka soo wada farcameen oo lumay kaas oo loo bixiyey Protolanguage.



Latin



Halkaa waxa lagu ogaaday jiritaanka qoyska loo yaqaan ‘Indo-European Family’ oo sida la sheego ka kooban ilaa l5O af oo ay ku hadlaan dad tiradooda lagu qiyaaso 3 bilyan oo qof. Qoysaska afafka adduunka waxa kale oo ka mid ah qoyska la yidhaa Afro-Asiatic (afafka Afrika iyo Aasiya lagaga hadlo) oo ka kooban 24O af, kuna hadlaan dad lagu qiyaaso ilaa 25O milyan oo qof. Waxa kale oo ayana ka mid ah kuwan hoos ku xusan:

- Sino-Tibetan
- Nilo-Saharan
- Austro-Asiatic
- Oto-Manguean
- Australian
- Dravidian
- Azteco-Tanoan

- Khoisan ***
- Caucasian Family
- Uralic-Yukaghir Family
- Altaic Family
- Chukchi-Kamchatkan ("Paleosiberian") Family

2.4. Bah weynta uu af Soomaaligu ka tirsan yahay

Af Soomaaligu wuxuu ka tirsan yahay bahweynta loo yaqaan AFRO- ASIATIC oo ka kooban lixda bahood ee kala ah:

1) Afkii Masaaridii hore (Egybtian)
2) Berber (Berber)
3) Samatik (Semitic)
4) Jaadik (Chadic)
5) Kushitig(Cushitic))
6) Beejada (Beja)
7)

Egyptian


Semitic

Berber

Cushitic

Omotic

Chadic



2.5. Xubnaha Qoyska Kushatigga

Xubnaha qoyskan waxa ka mid ah 30-50 af oo lagaga hadlo woqooyi-bariga Afrika. Waxaanay kala yihiin:

1. Kushatigga woqooyi /North Cushitic (Beja): Waxa lagaga hadlaa woqooyi bari ee dalka Suudaan. Waana hal af oo qudha.
2. Kushitigga dhexe/Central Cushitic: Waxa lagaga hadlaa Itoobiya iyo Ereteriya (in ka yar 10 af)
3. Kushitigga bari ee dhulka kore/ Highland East Cushitic: Waxa laga hadla koonfurta Itoobiya iyo woqooyiga Kiiniya. (Waana in ka yar 10 af)
4. Kushatigga ee godanka bari /Lowland East Cushitic: Waxa lagaga hadlaa Afrika dhankeeda woqooyi-bari .
5. Kushatigga koonfureed/South Cushitic: Waxa lagaga hadlaa bariga Kiiniya iyo woqooyiga Taansaaniya
6. Dullay-Yaaku:(2 ama 3 af oo lagaga hadlo Kiiniya

Kushatigga godanka bari ee /Lowland East Cushitic

Sida kor ka muuqata waxa uu af Soomaaligu ka sii tirsan yahay bah-yarta loo yaqaan Kushatigga Godanka Bari oo ka kooban:

1. SOOMAALI
2. SAAHO-CANFAR
3. RENDILLE
4. OROOMO
5. KONSOYDH (KONSOID)
6. BAYSO
7. ARBOORE (ARBORE)

3.O. SOOYAALKII QORAALKA FAR SOOMAALIDA


Qofkii u horreeyey ee isku deyey in af Soomaali wax lagu bartaa

Waxa uu ahaa Sh. Yuusuf Bin Axmed Al-kawneyn

- *-Alif wax maale*, *-Ba' hoskaalle* (Ba' hoosku hal leh), *Ta' korku labaale, Th' korku saddexleh*, *Jiim korku halle Xa' wax maale*, *Kha' korku halle*, iwm.

Far wadaad

Arabic with Somali words ("wadaad's script") (Lewis 1958:1 38)



Sooyaalka qoraalkii far Soomaalida waxaad si buuxda ugaga bogan kartaa buugga la yidhaa Far Tasawdey ee soo baxay gu'gii hore ee 2016kii.

4.O. Barashada afafka iyo sida loogu kala qaybsan yahay

4.I. Aragtida Dr. Ferdinand De Saussure



Aragtidan waxaa loo yaqaan “*Blank slate*”. Ujeeddada oo ah in kolka ay carruurtu dhalato maskaxdoodu tahay wax madhan oo aanay waxba ku qornayn.

4.2. Aragtida Noam Chomsky



Dr. Noam Chomsky oo ah (American) baa rumaysan inaan maskaxda carruurtu madhnayn kolka ay dhashaan ee uu jiro agab diyaar u aha
Barashada afka oo loo yaqaan Universal Grammar iyo aragtida ah ‘the idea of innateness’.

4.4. Barashada Af Soomaaliga

Af Soomaligu waa af aad u fac weyn oo soo jireen ah, waana af aad u hodan ah, qoto dheerna leh. Sida afafka kale ayuu
af ayuu leeyahay habdhismeedkiisa gaar ahaaneed. Tusaale ahaan:

Soomaali	Ingiriisi
Nin dheer	A tall
man Dheer nin *	A Man tall*

Af Soomaaliga iyo Af Ingiriisiga midna lama odhan karo labada qaab ee astaanta xiddigta leh.

U fiirso af Soomaaliga waxa horreeya magaca oo ah (Nin) waxaana ka dambeeya tilmaamaha oo ah ‘dheer’. Halka uu afka Ingiriisku ka yahay sidaa lidkeeda.

Sida afafka adduunka oo kale ayuu af Soomaaliga leeyahay af degello (lahjado) kala duwan oo kala ah:

1) Maxaad tidhi
2) Maay
3) Banaadiri
4) Garre
5) Tunii
6) Dabarre

Afka Maxaad tidhi oo loo arko inuu yahay ka dadka soomaaliyeed intooda badani ku hadasho ayaa 21kii Oktoobar 1972kii laysku raacay in xuruufta Laatiinka lagu qoro.

Maxay ku Kala duwan yihiin?

Barashada Afka iyo Suugaanta? Iyo Barashada Suugaanta iyo afka? Dadka qaar baa u arka inay labadaa hawraarood isku mid yihiin. Hayeeshee haddii dulucda laga eego aad bay u kala duwan yihiin. Ta hore waxa ay tilmaamaysaa in barasha afku ka horrayso ta suugaanta, taasi oo ah sida dadyawga adduunku wax u bartaan. Hawraarta labaadi waxay sheegaysaa in barashada suugaantu ka horrayso barashada afka. Adduunkana ilaa hadda lama hayo cidaa wax u barata.

Weydiinta kale waxay tahay:

Kala duwanaashaha: B iyo Ba, T iyo Ta, G iyo Ga, iqb?


Waxaan ogaannay intii aan afka dhigaynay in ay jiraan arday badan oo aan kala aqaaon waxa ay ku kala duwan yihiin ‘*B*’ iyo ‘*Ba*’, ama ‘*T*’ iyo ‘*Ta*’ ama ‘*G*’ iyo ‘*Ga*’.

Warcelinta weydiintu ma adka, hayeeshee, ardayga aan loo dhigin ama aan ku baraarugsanayn way ku adag tahay. SI kastaba ha ahaatee, warcelintu waxa weeye: Saddexda xaraf ee ‘B, T, iyo G’ waa sumadda saddexda xaraf, halka ‘Ba, Ta, iyo Ga’ ay ka yihiin dhawaaqyada saddexdaa xaraf.

5.O. ABLA ABLAYNTA AF SOOMAALIGA

Sida sawirka 1aad ee hoose ka muuqata afku wuxuu u qayb-samaa:

1. Hunnuuhunnuu iyo 2. Hadal.




Sawirka 1aad

5.I. Hunnuuhunnuu

Inuu afku sidaa u kala baxo waxaa marag-ma-doon u ah maahmaahda tidhaa: *Hunnuu-hunnuu hadal maaha, himbiriirsina wax arag maaha*. Sidaasi awgeed waxaan iyana u kala saari sida

sawirka 2aad ee hoos ka muuqda ku qeexan: a. Higgaad, b. Alan, iyo c. Qodob



Sawirka 2aad

5.1.1. Higgaadda

Guud ahaan higgaaddu waa sumadda xarfaha uu afku ka kooban yahay. Sida aad wada ogtihiinna af Soomaaligu wuxuu ka kooban yahay 32 xaraf oo kala ah 22 shibbane iyo 10 shaqal (5 gaagaa- ban iyo 5 dhaadheer).

Waxaana loo qoraa sidan hoos ka muuqata:

a. Shibbanayaasha:

B T J X KH D R S SH DH C

G F Q K L M N W H Y ’ (Firgin).

7-da Shibbane ee kala ah: B, D, R, G, L, M, iyo N ayaa laban-laab-ma kolka ay erayada qaar ku jiraan. Waxaana lagu soo koobay hawraarta ah ‘Ma nala garaad baa’

b. Shaqalada afkuna waxay kala

yihiin: Kuwa gaagaaban oo ah: A,

E, I, O, U.


Iyo kuwa dhaadheer oo kala ah: AA, EE, II, OO, UU.

5.l.2. Alan

Alanku waa marka ay shibbane iyo shaqal ama shaqal iyo shibbane israacaan sida: *na, ba, ka, ta, dha, ga, baa, waa, yaa, buu* iwm, ama *an, ab, ak, at*, iwm. Shaqal keligii alan buu noqon karaa kolka uu eray ugu horreeyo. Tusaale ahaan, *ul, af, aniga, ani, il, iil, uub, oog, eel, aar,* iwm., goonnin wuu isu taagi karaa, waana marka uu tix ugu dambeeyo.

Tusaale ahaan,


Rag waa kii kufa e, haddana kaca



Sawirka 3aad

5.l.3. Alanka iyo Dhismihiisa:

Alanku wuxuu u qaybsamaa ‘Xag’ iyo ‘Jaan’. Jaanta ayaa iyana u kala baxda ‘Bu’ iyo ‘Dub’ sida ka muuqata sawirka dhanka midig ku yaal. Kolka la rabo in la dhisto alan waxaa shardiya in ardaygu k aabka yahay. marka hore yaqaan inta alan ee eray kasta ahaan, erayga bad waa hal alanle. Erayga laba waa laba alanle, iwm.



Haddii aan is nidhaa dhisa qaab dhis- meedka erayga Bad oo hal alanle ahi waxa uu noqonayaa sida sawirka dhanka bidix ka muuqda.


Fiiro Gaar ah:

Sawirka 4aad

Eray ga ‘Bad’ waa eray hal

alanle ah oo uu shibbane u dambeeyo. Sidaasi awgeed erayga oo dhan waxaad dhex dhigaysaa bilaha afar geesoodka ah ee erayga Alan ku hor yaal.


Alan kasta shibbanaha u horreeyaa ayaa xag tiisa ah. Tusaale ahaan shibbanaha ‘’b’ baa ah xagta erayga ‘Bad’. Inta soo hadhay oo ah ‘-ad’ sida ay u dhantahay waa jaantii alanka. Waxaanad ku dhex qoraysaa bilaha afar geeska ah ee erayga jaan ku hor qoran. Xarafka ‘a’ee ka horreya ‘d’-da waxaan isna ku dhex qoraysaa labad bilood ee afar geeska ah ee erayga ‘Bu’ ku hor qoran. Ugu dambayntana xarafka ‘d’ oo ah xarafka u dambeeya erayga bad baad noqonaya dubkii alanka waxaanad ku dhex qoraysaa labad bilood ee afar geesoodka ah ee alanka u hor qoran erayga ‘Dub’. Alan kastana sidaasi si [illegible]yuu u dhismayaa.



Sawirka 5aad

5.l.4. Dhismaha alan shaqal dheer leh

Haddii aan is nidhaa dhisa qaab dhismeedka erayga ‘Beer’ oo hal alanle ahi waxa uu noqonayaa sida sawirka dhanka midig ka muuqda



Sawirka 6aad

Fiiro Gaar ah:


Erayga ‘Beer’ waa eray hal alanle ah oo uu shibbane u dambeeyo. Sidaasi awgeed erayga oo dhan waxaad dhex dhigaysaa bilaha afar geesoodka ah ee erayga Alan ku hor yaal.

Alan kasta shibbanaha u horreeyaa ayaa xagtiisa ah. Tusaale ahaan shibbanaha ‘’b’ baa ah xagta erayga ‘Beer’. Inta soo hadhay oo ah ‘-eer’ sida ay u dhantahay waa jaantii alanka, waxaanad ku dhex qoraysaa bilaha afar geesoodka ah ee erayga jaan ku hor yaal. Shaqalka dheer ee ‘ee’ kana horreya

xarafka ‘d’-a waxaad isna ku dhex qoraysaa labada bilood ee afar geesoodka ah ee erayga ‘Bu’ ku hor qoran. Ugu dambayntana xarafka ‘r’ oo ah xarafka u dambeeya erayga ‘beer’ baa noqonaya dubkii alanka,

waxaanad ku dhex qoraysaa labad bilood ee afar geesoodka ah ee ku hor yaal erayga ‘Dub’.

5.l.5. Dhismaha alanku marka aanu xag lahayn



Sawirka 7aad

Qaab dhismeedka erayga ‘ul’ oo hal alanle ahi waxa uu noqonayaa sida sawirka dhanka midig ka muuqda.

Waxaan hore u soo sheegnay in alan kasta shibbanaha u horreeyaa uu xag tiisa yahay sida erayada bad iyo beer. Hase yeeshee, erayga ‘ul’ shaqal baa u horreeya ee shibbane uma horreeyo. Sidaasi awgeed, waxaynu dareemaynaa inaanu erayga ‘ul’ xag lahayn. Weydiintu waxay haddaba tahay sidee baa alankiisa loo dhisayaa? Sidii caadada ahayd erayga ‘ul’ ooh al alanle ah waxaad ku dhex qoraysaa labada bilood ee afar geesoodka ah ee erayga alan ku hor taal.

Sida sawirka 7aad ka muuqata halkii xagta waxa la gelinayaa xariir (-). Waayo xag ma laha erayga ‘ul’ sidii aan soo sheegnay. Inta soo hadhay oo ah eraygii ‘ul’ oo dhan waxaad ku dhex qoraysaa labada bilood ee afar geeska ah ee erayga jaan ku hor yaal. Xarafka ‘u’ erayga ‘ul’ waxa lagu dhex qorayaa labada bilood ee afar geeska ah ee erayga ‘bu’ ‘ ku hor yaal. Xarafka ‘l’-da oo ah xarafka u dambeeya erayga ‘ul’. Wuxuu noqonayaa dubkii erayga waxaanu sidii caadada ahayd geleyaa halka u dambaysa sida sawirka ka muuqata.

5.l.6. Qaab dhismeedka erayga ‘Alan’ qudhiisa


Erayga ‘alan’ waa laba alanle. Qaab dhismeedkiisu wuu ka duwan yahay qaabkii hal alanlaha ahaa. Waxa uu kaga duwan yahay waa iyada oo loo

kala qaybinayo inta alan ee uu eraygu ka kooban yahay, mid kastana goonniidiisa loo dhisayo sida aad hoos ku arkidoontid.

Erayga ‘alan’ waxaan ku sheegnay inuu ka kooban yahay laba alan oo kala ah ‘a/lan’, waxaana loo jeeda alanka 1aad oo ah ‘a’ iyo ka 2aa oo ah ‘lan’. Mid kastana wuxuu u dhismayaa sidan soo socota:

I. Dhismaha alanka ‘a’

Hore waxaan u soo sheegnay in shaqalladu alan noqdaan kolka ay eray ugu horreeyaan ama tuduc ugu dambeeyaan, goonina isu taagaan. Sidaasi awgeed xarafka ‘a’ ee u horreeya erayga ‘alan’ waa alan aanu shibbane ka horreyn, kana dambayn. Sidaasi darteed waxaa halkaa innooga soo baxaysa aragtida ah inaanu alankani xag iyo dub toona lahayn. isuna Dhismihi uu noqonayaa sidan sawirka 8aad ka muuqata.




Sawirka 8aad

II. Dhismaha alanka 2aad ee erayga alan

Sidaan soo xusnay alanka 2aad ee eraygaasi waa ‘lan’. Waxaanu la qaab dhismeed noqo nayaa eraygii ‘bad’. Waayo wuxuu leeyahay qaybihii uu

Xag[L





aasi lahaa oo dhan.

Waxaanu u dhismayaa sidan sawirka 9aad ka muuqata.

Sawirka 9aad

5.2. Qodobbada

Sida ay in badani ogtahay, guud ahaan, af Soomaaligu wuxuu leeyahay laba qodob oo isbedbeddela, kuwaas oo kala ah: -ta iyo-ka. Qodobka hore wuxuu raacaa magacyada dheddig, kan labaadina kuwa lab. Tusaale ahaan:

Inan + ta [redacted] Inanta.

Wiil + ka [redacted] Wiilka

Qodobka -ta wuxu isu beddelaa: -da, iyo -sha. Xarafka ‘-t’ baana noqda ‘-d’ markuu raaco magac ku dhammaada shaqal ama xarfaha kala ah: d, c, x, h, y, iyo firgin ('). Tusaale ahaan:

i. Maro + ta [redacted] Marada
ii. Lo' + ta [redacted] Lo'da
iii. Irrid + ta [redacted] Irridda
iv. Duluc + ta [redacted] Dulucda
v. Qodax + ta [redacted] Qodaxda
vi. Bah + ta [redacted] Bahda
vii. Beeraley + ta [redacted] Beeraleyda

Markay ‘-t’ xigsato ‘-l’ waxay labada cod, haddaba, isku noqdaan ‘-sh’ sida:

i. Macal + ta [redacted] Macasha
ii. Ul + ta [redacted] Usha
iii. Il + ta [redacted] Isha
iv. Calool + ta [redacted] Caloosha

Qodobka ‘-ka’ isna wuxuu isu beddelaa ‘-ga’, ‘-ha’, iyo ‘-a’. Tusaale ahaan xarafka ‘-k’ baa noqda ‘-g’ kolka uu qodobka ‘-ka’

raaco magacyada lab ee ku dhammaada xarfaha kala ah: w, g, aa, y, i, iyo firgin (’) sida:

i. Fadhi +ka → Fadhiga
ii. Ruug + ka → Ruugga
iii. Waa + ka → Waaga
iv. Ey + ka → Eyga
v. Hu’ + ka → Huga
vi. Awoow +ka → Awoowga

Sidaasi oo kale xarafka ‘-k’ wuxuu noqda ‘-h’ marka uu qodobka ‘-ka’ raaco magacyada lab ee ku dhammaada labada shaqal ee -o ama -e sida:

i. Caano + ka → Caanaha
ii. Daawe + ka → Daawaha


Mar kale xarafka ‘-k’ wuu abraaraa kolka uu qodobka ‘-ka’ raaco magacyada lab ee ku dhammaada xarfaha kala ah: q, x, c, kh, ama h sida:

i. Qiiq + ka → Qiiqa
ii. Foox + ka → Fooxa
iii. Sac + ka → Saca
iv. Kaah + ka → Kaaha
v. Tookh +ka → Tookha

**Fiiro Gaar ah

Qodobbada oo faahfaahsan ka ee buugga Aasaaska Naxwsaha af Soomaaliga.

6.O. Qaab Dhismeedka Hadalka




Sawirka 10aad

Alan iyo ka badan oo ujeeddo sameeya ayaa la yidhaa hal ama eray. Tusaale ahaan, bad, laba, saddex, madax, boqon, segeger, iwm Sidaasi awgeed waxaan u kala saari karnaa 8 qaybood sida sawirkanhoos eku xusan:


6.l. Hal

Hal waxaan u kala saari karnaa sidan hoos ku qeexan



Magac M.-u-yaal Fal Tilmaame Xidh. M.leeye Yaab Diiradle

BARASHADA AFKA



Magacu waa qayb ka mid ah hadalka waxa loo bixiyaa noole iyo manoole .

Waana astaan u gaar ah oo lagu aqoon sado sida : Dad, duniyo, buur iyo banaan, bad iyo berri.

Magacu wuxuu ukala baxaa magac guud iyo magac gaar sida hoos ku xusan.

6.l.2. Magac guud

Magaca guud waa magaca loo siman yahay , wuxuuna u kala baxaa magac muuqda iyo magac qarsoon.

6.l.3. Magac muuqda

Waa magaca looma bixiyo waxa la arki karo, lana taban karo noole iyo manooleba sida qalin: buug, kursi, dacawo, cad, caano, subag, dhagax, harag, ul, bud, sariir, iwm. Waxaanu u kala baxaa tirsame iyo ma tirsame. Tirsame waa magacii la tiring karo sida adhiga, guryaha, baabuurta, iwm. Ma tisamahu waa magaca aan la tiring Karin sida biyaha, cammuudda, caanaha, iwm.

6.l.4. Magac qarsoon

Waa magaca loo bixiyo waxa ili-ma-aragtaya ah, lana taaban Karin. Sida: iftiin, hawo, diinta, run, been, xanuun, farxad, iwm.

6.l.5. Magac gaar

Magac gaar waa magac gooni u ah noole iyo ma noole

labadaba Tus: (1).Hargeysa waa magaalo madaxda Soomaaliland. (2) Maxamed waa bare

Jaad (Cayn) magac

Magacyadu waxay u kala baxaan lab iyo dhedig. Caynta magaca waxa lagu kala gartaa hadba qodobka gadaal ka raac. Tus: ninka, naagta, badda, gabadha, caloosha.

Tiro magac

Tirada magaca hadba sibay noqotaa, waxayna u kala baxdaa

1. Keli
2. Wadar
3. Koox

Keli lab

Magacyada lab ee kelida ah waxa ka mid ah :

Nin, roob, dab, faras, hadhuub.

Wadar lab

1. Magaca lab ee hal Alanlaha ah marka la wadaraynayo waxa soo noqda shibbanaha uu dambeeya oo laga horaysiinayo shaqalka (a)Tusaale ahaan sida :

   San - sanan, dab - dabab, mas - masas, wiil - wiilal, raad - raadad, doob - Doobab.

2. Magaca laba Alan iyo wixii ka badana marka la wadaray-nayo waxa laban laabma shibbanaha u dambeeya, waxaana gadaal ka raaca shaqalka (o) sida:
   Dabar - dabarro, hadal - hadallo, wadaad - wadaaddo, birqaab - birqaabbo, sibraar - sibraarro

3. Magaca lab ee kelida ah, kuna dhamaada xaradka (e) waxa xagga dambe ka raaca (yaal) Tusaale ahaan sida:

Bare - barayaal, tuke - tukeyaal, waraabe - waraabeyaal coomaade - coomaadeyaal, cirroole - cirrooleyaal

4. Magaca lab ee kelida ah ee ku dhamaada (y) waxa xagga dambe ka raaca (aal), Tusaale ahaan sida:

Oday - odayaal, fulay - fulayaal, caday - cadayaal

5. Magaca ka soo horjeeda af carbeedkana xagga dambe waxa uu ka qaata (iin), Tusaale ahaan:

macalin	macalimiin
mul-xid	mulxidiin
mujaahid	mujaahidiin
muslim	muslimiin
mutacalim	mutacalimiin
xaakim	xaakimiin

6. Magac yada lab ee kelida ah ee ku dhamaada xaradka (n) qaar kood waxa xagga dambe ka raaca (mo), (n)-da ayaana isu bedeshaa (m), Tusaale ahaan:

Fidhin - fidhimo, arrin - arrimo, qalin - qalimo, inan - innamo

Qaarna (m)-da waxa ku darsama (an),

Tusaale ahaan: Nin - niman, suun - suuman

7. Magacyada isku dhigidda iyo kala dhihidda ah ee lagu kala garto dhawaaqa waxa ka mid ah. Dibi - dibi. Awr - awr. Madax - madax. Cawl - cawl, iwm.

a) Xeerka dhawaqa hal Alan laha keliga ah ee shaqalka dheer ama gaaban erayo kooban oo si kale u dhaqma marka la wadaraynayo Tusaale ahaan:

Reer - reero, gu’ - gu’yaal, geed - geedo, iwm.

b) Erayada (y) ku dhamaada waxaan la socon erayo gaar ah. Tusaale ahaan : arday - ardo, arday.

Magaca dheddig ee kelida ah

Magacyada dhedig ee kelida ah waxa

ka mida Tus: inan, far, naag

Wadar dheddig

1) Magaca dhedig ee keliga ah ee ku dhamaada shibane wuxu xaga danbe ka qaataa xaraf (o) marka la wadaraynayo.
Tusaale: naag - naago, lax - laxo, bad - bado, hal - halo.
Kuwa xarafka (n) ku dhamaada ‘n’-da, (o) ayaa gadaal ka raacda. Tusale ahaan: islaan -islaamo, haan - haamo, laan - laamo, iwm.

2) Magaca dhedig ee keliga ah ee ku dhamaada (o) wuxu xaga danbe ka qaata (ooyin) marka la wadaraynayo
Tusaale: hooyo ,hooyooyin ,qaanso,qaansooyin ,wado,wadooyin,dareemo,dareemooyin,

3) Magaca dhedig ee keliga ah eek u dhamaada (I) marka la wadaraynayo waxa xaga danbe ka raaca (yo), Tusaale: ciddi - ciddiyo, mindi - mindiyo, xaashi - xaashiyo

Magac lammaane

Magaca lamaane waa magac ka kooban laba eray ama ka badan oo noqda hal eray (magac) oo sameeya magac sugan .
Tusaale: abaanduule, madaxweyne, magaalo-madax, sama-kaab, laasgeel, tog-dheer, laascaanood baligubadle

Magac-u-yaal

Magac uyaaladu waa erayo gala ama bedela hadalkii magaca qaatana qodobada isla mar ahaan taana qurxiya hadalka waxayna ukala baxaan shan qaybood.

a. Magac-u-yaal dad
b. Magac-u-yaal lahaansho
c. Magac-u-yaal tusmo
d. Magac-u-yaal su,aaleed
e. Magac-u-yaal noqod lahaansho

Magac-u-yaal dad

KELI	WADAR
Aniga	anaga
Adiga	innaga
Isaga	idinka
Iyada	iyaga

KELI	WADAR
Aan	aanu
Aad	aynu
Uu	aydin
Ay	ay

KELI	WADAR
I	na
ku	ina
idin	

KELI	WADAR
Ii	noo
Kuu	inoo
U	idin
U	u

6.I.2. Taabbudnimada Ereyga Magac iyo Adeegsigiisa

Cabdiraxmaan C. Faarax ‘Guri Barwaaqo’



U.S. Department of Health and Human Services
NIH News
National Institutes of Health

National Institute of Child Health and Human Development (NICHD)

FOR IMMEDIATE RELEASE
Tuesday, September 14, 2004

CONTACT:
Robert Bock or
Marianne Glass Miller
301-496-5133

E-mail this page
Subscribe

Children Follow Same Steps To Learn Vocabulary, Regardless of Language Spoken

Regardless of the language they are learning to speak, young children learn vocabulary in fundamentally the same way, according to a study by researchers at the National Institute of Child Health and Human Development of the National Institutes of Health.

The researchers found that, for the seven languages studied, nouns comprise the greatest proportion of 20-month-old children's vocabularies, followed by verbs and then adjectives.

The findings appear in the July-August issue of *Child Development*.

"This study shows that while languages may differ greatly, the sequence by which young children learn the parts of speech appears to be the same across different languages," said Duane Alexander, M.D., Director of the NICHD. "By learning about the normal progression of language development, we may be able obtain information that will help children who are having difficulty learning language."

For the study, Marc Bornstein and Linda Cote, researchers in NICHD's Child and Family Research Laboratory collaborated with researchers in Argentina, Belgium, France, Israel, Italy and the Republic of Korea to study language development in children learning to speak Spanish, Dutch, French, Hebrew, Italian, Korean, and American English.

In all, 269 mothers of children age 20 months took part in the study. Of the children in the study, 117 were girls, and 152 boys. All of the children were firstborn, had been born at term and spoke only one language (the main language of the community they lived in.) The mothers filled out a standardized questionnaire designed to gauge the extent of their children's vocabularies. The questionnaire included examples of nouns, verbs, adjectives, and "closed-class" words -- pronouns, question words, prepositions and articles, and quantifiers.

"Specifically, mothers in every country reported that their children said significantly more nouns than any other word class (verbs, adjectives, closed-class words)," the researchers wrote.

The researchers added that the finding held true regardless of whether the language spoken

http://www.nih.gov/news/pr/sep2004/nichd-14.htm 1/27/2006

Magac waa erey af Soomaaliya, waana erey gaaban oo ka kooban 5 dhawaaq (3 shibbane iyo 2 shaqal). Laga gaaban, lagana dheer. Hayee shee, lagama taab budsana laga mana adeegsi badna. Qoraalkan kooban oon filayo inuu innoo bidhaamindoono taabbud nimada ereygaa waxan marka hore ku eegi ujeeddooyinkiisa iyo siyaabaha loo adeegsado. Waxan raacin, oon tilmaan yar ka bixin, sida, kolka ereyga *horgale, ibgale,* ama *erey kalaba* loogu kordhiyo, ama isagaba dhexroore looga dhigo, ay ujeeddooyinkiisu isu beddelaan. Waxan iyana sheegi meelaha ereygan iyo jeeddadiisu ku soo arooreen sida maahmaahaha, maansada iyo Diinta Islaamka.

Ugu dambaynta waxan soo bandhigi yaabkii Cilmibaadhistii u dabeysey lagu ogaaday iyo kaalinta ay magac yadu kaga jiraan barashada afafka yar iyo weynba.

Ereyga 'magac' haddii aad ka baadho Qaamuuska af Soomaaliga (Yaasiin C. Keenadiid 1976) waxad arkaysaa inuu leeyahay dhawr ujeeddo. Ta u horreysa waxa uu ku sheegayaa inuu yahay: [waa] *erey ama tix, qof ama wax kale magac looga dhigay oo loogu yeedho.* Waa run midhkaasu oo qof kastaa wuxu leeyahay magac ujeeddo leh oo loo yaqaan, isaguna isu yaqaan. Dalkastaa magac u

gaar ah oo loo yaqaan buu leeyahay. Buug ama wargeys aan magac lahayni ma jiro. Magaalo kasta oo adduunka jirtaa magac u gaar ah bay leedahay. Duunyada aynu dhaqannaa waa sidoo kale. Jaamacad ama dugsi magaclaawe ihi ma jiro.

Ujeeddada labaad ee ereygu waxa weeye: *hadal wanaagsan oo qof u meel mara*, haddii aan si kale u nidhaa waa maamuus. Tan qudheedu waa dhab. Haddaan qof ku idhaa: *magacaa be*' ! Waan habaarayaa oo waxaan ku habaarayaa inuu maamuus beelo oo wixii uu sharaf lahaa dhulka galaan. '[hebel] *waa nin magac leh*', haddaan idhaa waxan ujeedaa waa qof sharaf leh oo la tixgeliyo. Hadduu qof kugu yidhaa, " *magaca Soomaaliyeed ha dilin*!", wuxu ujeedaa sharafteenna dhawr oo hayna maamuus ridin.

Ujeeddada saddexaad waa tu dhanka naxwaha ah, waxaanu abwaanku tilmaamayaa inuu magac yahay qayb ka mid ah qaybaha hadalka. Tusaale ahaan, ereyada geed, caano, dhul, Samakaab, qurux, foolxumo, dhabcaalnimo, dad iwm., waa magac.

Ereyga 'magac' haddaan *dibgale* ku ladhno wuxu yeelanayaa ujeeddo kale. Tusaale ahaan, Haddii dibgalaha 'ow' aan ereyga '*magac*' ku ladhno wuxu noqonayaa '*magacow*'. Waxaanu noqday fal. Ujeeddadu waa magaciisa sheeg. Haddii aan ku idhaa: *magacow qofkii warkan kuu sheegay*. Waxan u jeedaa sheeg magaca qofkii warkan kugu yidhi. Dibgalaha "dheb" haddaan raaciyo wuxu noqon "*magacdheb*" oo ah carrabbaab ama soo hadal qaad. Tusaale ahaan, haddaan ku idhaa: *Ninkaasi qofna muu magacdhebin*. Waa qofna magaciisa sooma hadal qaadin. 'u-yaal' haddii la raacsho wuxu noqon 'magacuyaal' oo ujeeddadiisu tahay kii meeshii magaca galay. Tusaale ahaan halkii aad magac ka adeegsan lahayd waxaad halkiisa gelineysaa magacuyaal sida: *isagaa cunay*. *Anigaa bixiyey lacagtii, iw*m.

Qoraalkani wuxu mar hore ku soo baxay buugga elektarooniga ee Dhaxalreeb II, 2007, warsidaha Hal aqoon tirsigii iyo degello badan oo ay ka mid yhiin: www.aftahan.com, www.farshaxan.com, www.redsea online.com, iyo www.wardheernews.com

Ereyo aan kala dhantaallayn kolka xagga dambe laga raaciyo ujeeddo kale ayuu ereygi yeelanayaa. Tussale ahaan haddii aan nidhaa: *waa qof magac wanaagsan*. Waxan u jeedaa waa qof magac fiican leh oo la tixgeliyo. Haddaanse idhaa: waa qof magac xun. Waa taas hore lidkeeda.

Kolka horgale lagu ladhana iyana ujeeddadiisi way is beddeleysaa. Tusaale ahaan, haddii aan 'u' ka horreysiinno ereygii 'magacow' wuxu noqonayaa 'u magacow' oo ujeeddadiisu tahay meel u xilsaar ama jago u dhiib.

Marka ereyga laftiisa dhexroore laga dhigo waa sidoo kale oo ujeeddo kale ayuu yeeshaa. Tusaale ahaan, haddii aan nidhaa '*ugu magac dar*', ujeeddadiisu waa qof kale magaciis ilmahan u bixi. Hayeeshee '*u magac bix*i' waa ilmo kolkaa dhashay magac cusub u bixi.

Intaa haddii aan ka gudbo bal aan eegno meelaha uu ereyga magac ku soo arooray. Haddaan dabagal ku samayno waxan soo heleynaa meelo dhawr ah oo uu ereygaasi ku soo arooray. Meelahaasi oo ay ka mid yihiin:

Maahmaahaha:

1. *Magacaaga wax badan baa yaqaan, muuqaagana waxa yar*. Waxa halkaa ka cad inuu magacu kaa dheereeyo oo dad badani ayakoon ku arag ama aanad adba la kulmin ay ku yaqaannaan. Laba arrimoodba way kugu maqli karaan: magac xumaan iyo magac wanaagsanaan labada.

2. *Magac bilaash uma baxo*. Iyana waa maahmaah kale oo tilmaamaysa inuu magac kasta oo labixiyaa uu leeyahay ujeeddo ee aanu iska bixin.

3. Magac iyo masiibaba maalin bay dhacaan. Tan iyana ujeed-dadeedu waxa ay tilmaamaysaa in magac wanaagsanida iyo masiibaduba ay maruun dhacaan. Tusaale reer dhan oo dhisan ayaa maalin qudha masiibo ku

habsataa oo la mooraduugaa. Haddii magac Eebbe ku siinayana waa sidaasi oo kale oo maalin uu baa laguu gacan haadiyaa oo hawl aad qabatay magac kuu soo jiiddaa.

4. *Magac miskiin lagama aha*. Maahmaahdani waxay tilmaamaysaa in qofkastaa jecelyahay inuu magac wanaagasan yeesho.

5. *Magac iyo lacagiba dadka way dooriyaan*. Tan qudheedu waxay innoo sheegeysaa in sida lacagta badani qofka hab nololeedkiisa u beddesho uu magaca wanaagsanina u beddelo.

Suugaanta:


Suugaanta lafteeda waa loo adeegsadaa ereygani kolka uu ujeed-dadiisu maamuus tahay. Tusaale ahaan, maanso uu tiriyey Gaarriye ayaa waxa ku jira tuduca ah:

Magac waa qasaalade wallee qado ma dhaafsado.

Gaarriye wuxu inna hogatusaalaynayaa inuu maamuusku u maydh-mo sida uskaggu u maydhmo. Sidaasi awgeed wuxu halkan ku muujinayaa inaanu sharaftiisa qado dhaafsan doonin oo aanu noqondoonin nin lagu tilmaamo inuu dhuuniraac yahay.

Diinta:

Ujeeddada saddexaad ee ereyga magac wuxu ku soo arooray Diinta Islaamka. Sida ku xusan Aayadda 31^{aad} ee *Suuradda Al Baqarah* ee Kitaabka *Quraanka* wuxu Eebbe, Korreeyoo hufnaaye, innoogu sheegay in kolkii uu abuuray Nebi Aadam (Nabadi Korkiisa ha ahaatee) uu baray magacyada. Waxaanay Aayaddu tidhi:



Al Baqarah

Haltebintii ay wadaaddadu ka bixiyeenna waa kuwan hoos ku qoran:

Soomaali:

31. Eebbe wuxuu baray Aadam magacyada dhammaan, markaasuu u bandhigay Eebe malaa'iigta kuna yidhi iiga warrama magacyada kuwaas haddaad runlowtihiin

Ingiriisi:

31 And he taught Adam the names of all things; then He placed them before the angels, and said: Tell Me the names of these if ye are right". Carabi:


هذا مقام ذكر الله تعالى فيه شرف آدم على الملائكة بما اختصه من علم أسماء كل شيء دونهم وهذا كان بعد سجودهم له وإنما قدم هذا الفصل على ذلك لمناسبة ما بين المقام وعدم علمهم بحكمة خلق الخليفة حين سألوا عن ذلك، فأخبر هم تعالى بأنه يعلم ما لا يعلمون، ولهذا ذكر الله هذا المقام عقيب هذا ليبين لهم شرف آدم بما فضل به عليهم في العلم فقال تعالى: {وعلم ءادم □الأسماء كلها} قال السدي عمن حدثه عن ابن عباس {وعلم ءادم □الأسماء كلها} قال: عرض عليه أسماء ولده إنسانا إنسانا والدواب فقيل: هذا الحمار، هذا الجمل، هذا الفرس، وقال الضحاك عن ابن عباس {وعلم ءادم □الأسماء كلها} قال: هي هذه الأسماء التي يتعارف بها الناس إنسان ودابة وسماء وأرض وسهل وبحر وجمل وحمار وأشباه ذلك من الأمم وغيرها، وروى ابن أبي حاتم وابن جرير من حديث عاصم بن كليب عن سعيد بن سعيد عن ابن عباس {وعلم ءادم □الأسماء كلها} قال علمه اسم الصحفة والقدر، قال نعم حتى الفسوة والفسية، وقال مجاهد {وعلم ءادم □الأسماء كلها} قال علمه اسم كل دابة وكل طير وكل شيء، كذلك روي عن سعيد بن جبير وقتادة وغير هم من السلف أنه علمه أسماء كل شيء، وقال الربيع في رواية عنه أسماء الملائكة. وقال حميد الشامي أسماء النجوم. وقال عبد الرحمن بن زيد علمه أسماء ذريته كلهم، واختار ابن جرير أنه علمه أسماء الملائكة وأسماء الذرية لأنه قال {ثم عرضهم} وهذا عبارة عما يعقل وهذا الذي رجح به ليس بلازم،

Ibna Kathir

Sida kor ka muuqata, ma jiro wax oddoros ah oo tilmaamaya saamaynta ay dadka ku leedahay aqoontii Eebbaheen Aadam baray markii uu abuuray. Heeyeeshee baadhitaannadii la sameeyey ayaa loo adeegsan karaa iney arrintaasi saamayn weyn ilaa hadda dadka ku leedahay.

Wixii baadhitaannadii u dambeeyey ay tilmaameen:

Qoraal laga soo saaray baadhitaan, uu hirgeliyey Machadka la yidhaa *National Institute of Health* oo ka tirsan Wasaaradda

Caafimaadka ee dalka Maraykanka ayaa arrin la yaab leh lagu soo badhigay. Qoraalkaasi oo ladhkiisu ahaa

“Children follow same steps to learn vocabulary, regardless of language spoken” laguna soo saaray warsidaha *“Child Development*” tirsigii soobaxay *Juulaay Ogost ee 2004ta*, ayaa sheegay in carruurtu isku si u barato afafka. Qoraalku wuxu intaa ku daray in habka ay carruurtu u barato ereyada afka, afkasta habaranayaane, uu isku mid yahay.


Baadhayaashu waxay ku ogaadeen toddoba af oo ay baadheen in magacyadu ugu badanyihiin ereyada ay bartaan carruurta da’doodu tahay 20ka bilood, kadibna barashada falalka iyo tilmaamayaashu ku xigaan. Guud ahaan waxa baadhitaankaasi ka qayb qaatay 269 hooyo iyo carruurtoodii oo jira 20 bilood. 117 ka mid ah carruurtaas ayaa hablo ahaa, 152ka kalana wiilal bay ahaayeen. Ilmo kastaa wuxu ahaa curadkii ama curaddii reerka. Hooyooyinka carruurtaasi baa ka warcelinayey weydiimo isku mid ah oo baadhitaankaa loogu talagalay. Weydiimaha waxa ka mid ahaa ereyo magacyo ah, dar falal ah iyo qaar tilmaamayaal ah. Waxa kale oo ka mid ahaa kuwa loo yaqaan ereyada oodan (sida magac-u-yaallada iyo qodabbada). Hooyo kastaa waxay sheegtay inuu ilmaheedu ku hor hadlay ereyada magacyada ah, kadibna falalka iyo tilmaamayaasha.

Marc Bornstein iyo *Linda Cote* oo baadhayaal ka ah *NICHD* ayaa baadhitaankan gacansaar kala yeeshay baadhayaal ka kala tirsan dalalka *Arjantiina, Beljiyamka, Faransiiska, Yuhuudda, Talyaaniga iyo Jamhuuri yadda Kuuriya* si ay u ogaadaan sida barashada afafka carruurtu u kobocdo.

Dr. Bornstein baa tidhi, “Waxa jira hab laga simanyahay oo ay carruurtu afka u barato.” Waxa kale oo ay dhakhtaraddaasu tibaaxday in sababta ay carruurtu magacyada u horbartaan tahay

magacyada oo ah wax la taaban karo iyo wax la arkikaro, halka ay falalka iyo tilmaamayashu ka yihiin wax dahsoon oon maskaxda carruurtu qaban karin.

Dhanka barashada afafka, in kasta oo aanan sheegikarin iney barayaashii dejiyey buugaagta dhallaanka da’doodu u dhaxayso saddex bilood - 23 bilood ee loogu talagalay in lagu baro akhriska ay yaqaanneen aragtidan iyo in kale, haddana waxad dareemeysaa in badiba buugaagtaasi ku salaysan yihiin aragtida kor ku xusan. Buugaagtaasi waxay carruurtu ka barataa magacyada xubnaha jidhka, xoolaha kuwa badda iyo dhulkaba, qaababka, qalabka guryaha lagu adeegsado, iwm. Waxa iyana la yaab leh in sida afafka loo baro dadka waaweyni la mid tahay sida dadka yaryar loo baro. Qofkasta oo baranaya sida loo qoro af aanu lahayn waxa lagu bilaabaa barashada dhawaaqa xuruufta afka uu baranayo. Intaa ka dib waxa la baraa ereyo gaaggaaban sida kuwa xubnaha jidhka, dhismayaasha, qalabka dugsiga yaalla, kuwa guriyaha lagu adeeg-sado, iwm.



Israaca Shaqalada iyo Shibbanayaasha (B & T)

Shaqal Gaaban	Tusaale	Shaqal Dheer	Tusaale
B			
Ba	Bad	Baa	Baal
Be	Berri	Bee	Beer
Bi	Bil	Bii	Biirin
Bo	Bocor	Boo	Bood
Bu	Burris	Buu	Buug
T			
Ta	Tabar	Taa	Taallo
Te	Tegid	Tee	Teeb
Ti	Timo	Tii	Tiir
To	Toban	Too	Toon
Tu	Tuhun	Tuu	Tuug

Mar aan warsaday Liibaan Axmed, oo ah bare Soomaali yeed, oo af Soomaaliga ka dhigijirey xero qaxooti oo ku taal dalka Yaman wuxu ii sheegey in buugaagtii ay adeegsan jireen oo ay soo diyaarisay

UNESCO ereyadii u horreeyey ee ardayda la barijirey ay ka mid ahaayeen ereyada:

Bar, Baal, Beer, iwm


Waxa halkaa innooga muuqda in ereyadaasi dham maantood yihiin kuwii aan hadal hayney ee ahaa magacyada. Mar aan dhugtey buugga la yidhaa “*Aftahan:barashada af Soomaaliga*” (Cabdifataax M. Yuusuf 2003) oo loogu talagalay in af Soomaaliga laga barto, ayaad dareemeysaa inuu isna aragtidaasi ku salaysanyahay. Xarafkasta kolka dhawaaqiisa la sheego waxa la sheegayaa dhawr

erey oo uu dhawaaqu ku jiro. Tusaalooyinka uu buuggu qoray badankoodu waa magacyo.

Ugu dambayn, qoraalkan oon ku eegayey ujeeddooyinka ereyga magac iyo sida uu isku beddelo kolka wax la raaciyo ayuu baadhitaankaasi innoo caddaynayaa taabbudnimadiisa iyo in barashadii uu Eebbaheen ku baray Nebi Aadam magacyada ay saamayn weyn ilaa hadda dadka ku leedahay, yar iyo weynba, kana muuqato barashada afafka iyo adeegsiga eraygaasiba.


6.2. Hawraar

Eray iyo ka badan kolka la xidhiidhiyo ayaa la yidhaa hawraar. Waxaanan u kala qaadi karnaa sida sawirkan hoos ka muuqata Tix iyo Tiraab.



6.2.I. Tiraab

Hadalka aan jiib iyo jaan toona lahayn baa noqonaya tiraab, waxaana loo kala saari karaa sida;



Sida sawirka kore ku xusan tiraab waxaan u kala saari sidan:

Halhays: Waa weedh murti leh oo la wada yaqaanno, uuna *HEBEL* yidhi: Findhicil ma xaraan baa mise waa xalaal?”

Odhaah: Waa weedh murti leh oo la wada yaqaanno, misna *FURAN* (wax laga beddeli karo ama lagu dari karo, waxaanay u kala baxda afar jaad:

(1) Odhaah dhan, taasi oo ah a) mid sarbeeb leh (Markii geel loo heesuu dameerro u heesaa --->*Makii geel loo heesuu Barqaaqo dameero u heesaa*); b) mid aan sarbeeb lahayn, tusaale ahaan: Gaabni iyo gacan maroodi waxba ugama dhexeeyaan ---> *Barqaaqo gaabni iyo gacan maroodi waxba ugama dhexeeyaan*); c) mid ay dulucdeedu mugdi tahay, hadii aan la aqoon sheekada ka dambeysa (Maxay ku nuugtaa ama ka nuugtaa? ---> *Georgi wuu ku dhacay Barwaaqo, dabadeedna yidhi: Muxuu ku nugtaa ama ka nugtaa*?). (2) Odhaah dhiman (3) Odhaah magaceed (4) Odhaah faleed.

Weedh: Hadal ka kooban Fale+fale+la fale oo u jeeddo leh, Taasi oo loo yaqaan weedh dhan.

Murti: 1. Hal-hays, oo ah weedh murti leh oo la wada yaqaanno, uuna *HEBEL* yidhi: Findhicil ma xaraan baa mise waa xalaal?” 2. Hal-xidhaale, iyo Hal-qabsi. <u>Waa la yaqaan qofkii yidhi.</u>

Maahmaah: Waa weedh murti leh oo la wada yqaanno, misna *XIDHAN*. Waxay u kala baxdaa saddex nooc:

a) mid sarbeeb leh (Geel aan gaawo loo hayn lama godlo),
b) mid aan sarbeeb lahayn (Caado la gooyey caro Allay leeahay);
c) mid ay dulucdeedu mugdi tahay, hadii aan la aqoon sheekada ka dambeysa (Tuugow, hillaaca yaa kula ogaa?)

Waxaa haddaba xusid mudan in halkan lagu caddeeyo inaan maahmaaha iyo odhaahaha midna la aqoon ciddii samaysay ama tidhi. Qofna u odhan


Karin maahmaah baan sameeyey. Waa murti ka dhalatay bulshada kuna dhisaalan waayo aragnimadeeda, garashadeeda iyo ilbaxnimadeeda intaba. Halhayskuse sida uu Prof. Georgi sheegay waa murti la yaqaan qofkii yidhi. Sidaasi awgeed, dadka dhowaanahan sheegaya inay maahmaaho sameeyeen waxa habboon inay yidhaahdaan murti baannu soo kordhinney. Qaadasha- deedana u dhaafaan dadweynaha.

Hab qoraalka wanaagsan

Wax yaabaha looga baahan yahay qoraalka Soomaaliga waxa u horraysa kala garashada shibbanayaasha laban laabma iyo kuwa aan laban laabmin. Waxa mar kasta qasab ah oo habboon in la kala yaqaan marka ay shibbanayaashaasu laban laabmayaan iyo marka aanay laban laabmahayn.

Tirada shibbanayaasha labanlaabmaa waaToddoba (7) shibbane oo qudha. Waxaana laban laabma shibbanayaasha ku jira weedhan tidhaa: Manalagaraad baa. Tusaale ahaan: Dhammaan, sannad, kelli, buugga, carruur, haddii, aabbo, iwm

Dhibaatada ay higgaad xumidu keento:



QALLIN JABISEE, GUULI WAA WALI! W/Q Dr.Mohamed-Culimo.

Aan duco iyo hambalyo iskugu daro ardayda ka qallin jabisay jaamacadda dalka iyo dibaddaba. Soo barbaara aan idhaahdo ubadkeena ka gudbay fasalada 4aad ee dugsiyada sare iyo fasalka 8aad ee dugsiga dhexe. Inta dedaalka iyo nasiibka isku darsatay ee kaalmaha wanaagsan heshayna waxay mudan yihiin dhiiri galin.

Ardayda qallin jabisey inay dhamaantood aqoonyahano yihiin iyo in kale waa su'aal doodi ka furan tahay. Dad badan ayaa dood ka qaba tayada aqoonta aad barateen iyo nidaamka uu u dhisan yahay hab aqooneedka qarankeenu (Education system). Su,aashaas iyo qaar kale oo xan xantaynaya quluubta dadka idin jecel ,idinka ayaa hab ficil ah kaga jawaabi kara. Inta badan bulshadeenu aqoon uma laha sida ay u qiimaynayaan aqoontiina laakiin waxay si fiican u qiimayn karaan dadnimadiina iyo dhaqankiina oo ka turjumi karta aqoonta aad xambaarsan tihiin ee amaanadda idinku ah.

Prof.Maxamed Cumar Jiir oo ka tirsan golaha wakiilada Somaliland oo ahaan jiray Vice-chancellor-ka jaamacadda Hargeysa oo ka hadlayey qallinjabintii u horaysay ee jaamacadda Hargeysa (2004) ayaa laga hayaa ,"Tirada ardayda jaamacada is qortay bilawgii way badnayd, in yar oo ka mid ah ayaa qallinjabisay, intii kalena duruufaha ayaa liqay" . Waa hadal meeshiisa leeg oo muujinaya in imtixaanka ugu adag ee dadka kala saaraa yahay waayaha wakhtigu wato iyo duruufaha nolosha ee is bed bedelka badan. Imisa qof oo aad isku fasal ahaydeen ayaa ka hadhay tacliinta oo wakhtigu ka hiilliyey?. Ma awoodaada iyo xeeladaada ayaad halkaas ku soo gaadhay?. Saw ma haboona inaad Ilaaha sidaa kaa yeelay sujuud u dhacdo?.

Waa hubaal hadii aanad dedaalin Aqoonta amaanadda kugu ahi ka waran hadday halkaas gaadhsiiso?. Saw dhanwalba se maaha?.

Waa run oo dalka shaqo la aani jirtaa, waxaase ka sii daran barbar socota shaqaysanimada. Qofkastaa wu doonayaa oo uu ku hamiyayaa xafiis fadhiisto. Hadda ku dars xafiisyada wadanka ku yaal hadii qaybiyo inta qallinjabisay inam deeqayaan.

Qallin jabintii dufcadii labaad jaamacadda Hargeysa oo beegnayd 2005-tii , waxaa hada jeediyay Dr.Sacad Cali S (wasiirka qorshaynta qaranka oo wakhtigaa ka mid a qurbajoogta UK iyo gudidii

7. Xasilloonidarrada Af Soomaaliga

Cabdiraxmaan C. Faarax “Barwaaqo”

Afna ma taabbagalo haddii aanu xasilin. Xasilloonidarraduna waa dhibaatada ugu weyn ee hadda Af-soomaaliga haysata. Dad badan oo qoriddiisa xiiseeyana waa arrin walaac ku haysa. Waxaan haddaba qoraalkan wax yar kaga ifini arrintaa aniga oo u kala saaridoona dhibaato ka taagan xagga dhawaaqa iyo mid ka aloosan dhinaca qoraalka. Waxa kale oo aan isku deyi inaan tilmaan yar kabixiyo sida ugu habboon ee loo maarayn karayo dhibaatooyinkaa iyaga ah.

1972kii waxa la qaatay in Af-soomaaliga xuruufta laatiinka lagu qoro. Hayeeshee lama guddoomin in isku si loo qoro. Waxan ujeedaa

lama qeexin sida loo kala duwayo qoraalka iyo hadalka. Arrintaasina, runtii, waxay dhalisay in qofkastaa Afka u qoro sida uu isagu ugu hadlo. Tusaale ahaan:

l. Shibbanayaasha:

a) Dh R

Adhi *Ari*

Foodhi *Foori*

Yidhi *Yiri*

Cadho *Caro*

Gabadh *Gabro*

b) B M

Laba *Lama*

Habeen *Hameen*

C) C Q

CAarnidhuuf *Qandhuuf*

d) D dh

Bud *budh*

e) X*Gabar* Kh

Xaako *Khaakho*

f) M N

Shimbir *Shinbir*

Sambab *Sanbab*

Dambe *Danbe*

Toban *Toman* *Gambo* *Ganbo*

Tabar *Tamar*

g)	J	Y	b)	O	A
	mooji	mooyi		*Gobol*	*Gabal*
	jaxaas	yaxaas	c)	U	I
				Dhufasho	*Dhifasho*
2.	Shaqallada:		d)	A	I
	a) I	U		*Tallaabo*	*Tillaabo*
	Dib	*Dub*			

Arrintani runtii waxay dhibaato xoog leh ku haysaa dad badan oo afka barta oo shisheeye iyo sokeeyaba leh. Dhab ahaanna, dhibaatadu maaha mid Af- soomaaliga keli ku ah ee waa mid ay afaf badani soo mareen kana soo gudbeen loona baahan yahay inaynu dhug -mo gaar ah u yeelanno. Waxa afafkaa ka mid ah Af-carabiga. Tusaale ahaan, dalalka gacanka carabta, dadku xarafka *Kaaf* ‘ ’ waxay ugu dhawaaqaan *Jiim* ‘ ’. Marka ay isbariidinayaanna waxay yidhaahaan

‘*Jeef xaalaj*? ‘ ¹ ¸’ . Hayeeshee kolka ay qoraal noqoto waxay qoraan ‘*Keef xaalak* ‘ ¹ ’ .¹ Dalka Masar dadkiisu xarafka ‘*Qaaf* waxay ugu dhawaaqaan ‘*A* ’ Marka uu haddaba qof Masriyihi doonayo inuu kugu yidhaa ‘*waxan ku leeyahay*’ wuxuu ku odhanayaa ‘ ’.¹ Hase ahaatee kolka uu qoraal maago waxa uu qorayaa ‘*Aqullak* ¹ ’.

Afka Ruushka haddaan dhankiisa eegno sidaas oo kale ayaan aragtidan mid la mid ah ugala kulmaynaa. Tusaale ahaan dadka u dhashay ama ku barbaaray jamhuuriyadda Ukraa’iin xaraf ka ‘*g*’ waxay ugu dhawaaqaan ‘*H*’. Kolka uu qof doonayo inuu ku yidhaa ‘*waxan ku hadlaa af-ruush*’ wuxuu ku odhanayaa ‘*Yaa habaaruu baa Ruski*’. Hayeeshee kolka ay qoraal tahay waxa uu qorayaa ‘*Yaa gafaaruu baa Ruski*’.

(ga) (ha)

Af-ingiriiska qudhiisa aragtidan oo kale waan kala kulmaynaa. Tusaale a-haan magaalamadaxda Kanada dadka reer Kanada waxay ugu dhawaaqaan ‘*Odhowa*’. Hase ahaatee kolka la qorayo waa ‘*Ottawa*’. Ereya -da kala ah ‘*bottle*’, ‘*Bottom*’ iyo ‘*Butter*’ waxay ugu dhawaaqaan ‘*Bodhol*’ , ‘*Bodhom*’ iyo ‘*Badhar*’.

Sida aan haddaba soo tibaaxay, xasilloonidarradu dhawaaqa oo qudha kuma koobna ee qoridda lafteeda way saamaysaa. Waxa iyana loo baahan yahay in si uun laysku raaco si qoraalku isku mid u noqdo. Tusaale ahaan:

Barayaal - Bare-yaal.
Biyamareen - Biyo-mareen. Caanagaleen - Caano-galeen.
Furayaal - Fure-yaal.
Indhakuul - Indho-kuul. Kaaliyayaal - Kaaliye-yaal. Qaansaroobaad - Qaanso-roobaad. weriyayaal - weriye-yaal.

Waxa tilmaan gaar ah ayana mudan ereyada isku dhigmada ah hayeeshee kala dhihidda ah oo ay adagtahay in la kala saaraa. Tusaale ahaan:

Addoon - Addoon
Awr - Awr
Baqal - Baqal
Baraarug - Baraarug
Beer - Beer
Curad - Curad
Dameer - Dameer
Diin - Diin
Dooro - Dooro
Fool - Fool
Gar - Gar
Gool - Gool
Inan - Inan
Raran - Raran

Haddii erey kasta oo ereyadaasi ka mid ah qodobkiisa la raaciyo si hawlyar baa loo kala garan karaa sida:

Addoon(-ka) - Addoon(-ta) *Awr(-ka) - Awr(-ta)*

Baqal(-ka)	*- Baqal(-sha)*	*Dooro(-da)*	*- Dooro(f)*
Baraarug(-ga)	*- Baraarug(-ta)*	*Fool(-ka)*	*- Fool(-sha)*
Beer(-ka)	*- Beer(-ta)*	*Gar(-ka)*	*- Gar(-ta)*
Curad(-ka)	*- Curad(-da)*	*Gool(-ka)*	*- Gool(-sha)*
Dameer(ka)	*- Dameer(-ta)*	*Inan(-ka)*	*- Inan(-ta)*
Diin(-ka)	*- Diin(-ta)*	*Raran(-ka)*	*- Raran (til.)*

Waxa, haddaba, jirta kol aanay ereyadaasi qaadan karin qodobbo oo ay adagtahay in la kala saaraa. Kolkaasi oo ah kolka ay ereyadu weedho ku jiraan. Tusaale ahaan, haddii la yidhaa:

Xaddiyo inan bay
ummushay. Geeddi baa
gool dilay.
Shukri waa curad.
Cali dameer buu
fuulay. Baqal baan
arkay.

Weedha hore lama kala garan karo inay Xaddiyo gabadh ummushay iyo iney wiil ummushay. Midda labaadna lama sheegi karo inuu Geeddi awr gool ah dilay iyo inuu baranbarqo dilaytoona. Shukri ma curaddii reerkaa mise waa curadkii? Cali muxuu fuulay ma dameerkoodii mise dameertoodii? Aniga qudhaydu maxaan arkay ma baqalkii la cunayey mise baqashii gammaanka ahayd?

Ereyada shaqalka culus iyo kuwa shaqalka fudud baa qudhoodu u baahan in qoraalka lagu kala qeexo sida:

Dul(-ka) *- Dul(-sha)*

Duud(-da) - *Duud(-ka)*

Daaf(-ka) - Daaf(-ta)

Duulid(-da) - Duulid(-da)

Maagid(-da) - Maagid(-da)

Sugid(-da) - Sugid(-da)

Tuur(-ka) - Tuur(-ta)

Tusaalooyinkii hore (kuwa dhawaaqyada) waxa innooga dhuroobey iney jiraan dad badan oo dhibaatooyinka aan ka cabanayno soomaray oo aan la wadaagno. Hayeeshee ay si habboon oon turxaan lahayn u maareeyeen. Waxa kale oo halkaa innooga muuqata in afkii loo kala saaray mid qoraalka u goonniya oo laga simanyahay iyo mid hadalka u gaar ah oo qofkastaa u hadlo sida uu isagu jecel yahay. Waxa kale oo tilmaan mudan in la sheego inaanay dadkaasi afkooda kala sheeganin ama kala xigteysanin.

Haddaba, sida keliya ee uu Af-soomaaliguna dhibaatadaa kaga bixikaraa waa iyada oo afka loo kala saaro sida afaf -kaa aan soo tilmaamay

a) *Af qoraalka u gaar ah, iyo*

b) *Af hadalka u goonniya (af-guri)*.

Midhkaas oo aan ula jeedo inaan qof waliba u qorin afka sida uu isagu ugu dhawaaqo ee uu Af-soomaaligu noqdo, sida afafka kale, mid si loo wada qoro.

Waxa haddaba isweydiin leh sida loo xulanayo dhawaaqa la qaadanayo. Qof ahaan waxa aniga ila qumman in laba arrimood mid

la yeelo. Waa ta koobaade in la qabto guddi-aqooneed afka aqoontiisa ku talax tagtay kana kooban dhammaan gobollada Af-soomaaliga lagaga hadlo. Guddidaas oo xilkeedu noqon doono inay inoo soo xusho dhawaaqa aan qoraalka u qaadandoonno ayaka oo ka

eegaya dhinacyo badan sida: naxwaha, dha -qaalaha, afka quruxdiisa iyo weliba aragtiyo kale oo laga yaabo iney jiraan hayeeshee aanan hadda haabka ku hayn. Waa ta labaade in tirakoob la sameeyo oo dhawaaqa loo bato qoraalka loo qaato iyada oon loo arkayn, kii la doonaba ha la qaatee, in dhawaaqa la qaataa ka wanaag sanyahay kuwa kale een la qaadan.

Tusaalooyinka dambe dhawr aqoonyahan baa isku deyey iney wax ka qabtaan. Tusaale ahaan *Dr. Yaasiin C. Keenaddiid* wuxuu ku adeegsaday buuggiisa la yidhaa *Qaamuuska Af-soomaaliga (1976)* astaantan soo socota:

Dulº (-ka)

Duuf° (-ka)

Duudsi°(-ga) Duulidº (-da)

Sugidº (-da)

Maagidº (-da)

Tuur° (-ka)

Waxa ayana astaanta hoos ku qoran ku adeegsaday buugga la yidhaa *Dizionario Somalo-Italiano (1985)* aqoonyahannada kala ah *Ciise Maxamed Siyaad, Agostini, Francesco, and Annarita Puglielli*

Duˌˌl(-ka)

Duˌˌuf (-ka)

Duˌˌudsi(-ga)

Duˌˌulid (-da)

Suˌˌgid (-da)

Maˌˌagid (-da)

Tuˌˌur(-ka)

Aniga qudhaydu waxan damcay inaan ku adeegsado buugga la yidhaa *Abwaan cusub oo Af-soomaali iyo Af-ingiriisiya (1995)* astaan ka geddisan kuwa aan sheegay. Tusaale ahaan:

0

Dul (-ka)

—

Duuf (-ka)

—

Duudsi(-ga)

Duulid (-da)

—

Sugid (-da)

—

Maagid (-da)

—

Tuur(-ka)

Haseyeeshee, markii aan ogaaday iney jiraan aqoonyahanno arrinka dhaaday iskuna deyey iney hortey wax ka qabtaan ayaan go'aansaday inaan uga hadho kalana doorto labadaa astaa-mood ee ay adeegsadeen. Waxanan qaatay midda dambe, iyada oo ay ujeeddadaydu ahayd inaan lays barbar ca-rarin, qof walibana doonin in la yidhaa isaga ayaa tiisii la qaatay. Haddii arag-tiyo kale la keenayana waa arrin furan.

Astaamahaasi waxay gaar u yihiin, sida muuqata, ereyada shaqalladoodu culusyihiin iyo kuwa la dhigidda ah oo qudha, kuwaasi oo ayana u baahan in la mideeyo. Kuwa isku dhigidda iyo kala dhihidda ah een soo tilmaamayna waxa habboon oo lagama maarmaan ah in ayana astaamo kuwaa la mid ah ama ka geddisan lagu adeegsado. Tusaale ahaan:

Xaddiyo ínan (wiil) bay ummushay. Xaddiyo inán (gabadh) bay ummushay.

Shukri waa cúrad.

Geeddi baa gòol(awr) dilay.
Geeddi baa góol(baranbarqo) dilay

Shukri waa curad

Damèer baan fuulay.
Daméer baan fuulay.

Báqal baan arkay. Baqál baan arkay.

Hadal iyo dhammaantii, qoraalkan kooban waxaan kaga soo hadlay qaar ka mid ah xasilloonidarrada ka jirta af-soomaali ga, aniga oo tusaalooyin ka bixiyey, tilmaamayna sida ugu habboon ee loo maarayn karayo. Waxan soo bandhigay aragtida ah in afka, sida afafka kale, loo kala saaro af qoraalka u gaar ah (si afka iskusi loogu qoro) iyo mid hadalka u goonniya (si uu qof kas -taa ugu hadli karo dhawaaqa jiiddiisa u gaarka ah). Waxa kale oo aan tibaaxay iney jiraan ereyo ay adagtahay in lagu kala saari karo dhanka qoraalka oo ayana u baahan wax ka qabasho. Aniga oo aragti ahaan tilmaamay sida ay iila muuqato in wax looga qaban ka-rayo. Haddii aan, haddaba, arrimahaa iyo qaar badan oo kale wax laga qaban waxa hubaal ah inuu afku sidaas u murugsanaandoono murankuna u jiridoono.

QAYBAHA HADALKA

Hadalka qaybihiisa waaweyni guud ahaan waxay ku kala baxaan sagaal qaybood (9)Ku waasoo kala ah,

1) Qodob
2) Magac
3) Magac uyaal
4) Tilmaame
5) Fal: fal-ebyane, fal ma ebyane, fal gargaare, falkaab
6) Xidhiidhiye
7) Meeleeye
8) Yaab

8. Suugaan

Ereyga suugaan wuxuu leeyahay dhawr ujeeddo oo kala ah:

1. Laydh qabow oo roobka dabadii dhabata baa loo yaqaan suugaan

2. Kolka uu roobku da'o naqa u horreeya ee soo baxa baa isna la yidhaa suugaan. Meel suugaan leh = meel naq leh ama meel cosob leh
3. Hadhuudhka kolka la tumo ee la kala hufo ama la kala haadiyo inta ugu fiican ee budada ah baa iyana la yidhaa suugaan.
4. Hadalka intiisa ugu macaan ama ugu quruxda badan ee wax laysugu sheego ayaa la yidhaa suugaan
5. Mar waxa uu ereygu la ujeeddo yahay ereyga murti
6. Laamaha cilmiga mid ka mid ah waxyaalaha laga yidhi ama laga qoray baa iyana la yidhaa suugaan
7. Wax allaale wixii jaan iyo jiib leh ee la tiriyo ayaa hadda loo yaqaan suugaan ama maanso

Maanso iyo Gabay

Maanso:

Waa magac guud oo mideeya dhammaan jaadadka suugaanta kala duwan ee tixaysan 2. Mar labaadka maanso waxay la mid tahay tix. Taasi oo leh miisaan iyo xaraf raac u gaar ah.

Gabay

Gabaygu waa bad ka mid ah badaha suugaanta ama maansada oo leh hojis iyo hooris.Tusaale ahaan:

Nimankii Almadar een lahaa, odayaday dhaami

Qaybaha Maansada

Maansada Soomaalidu way farabadan tahay. Waxaana loo kala saaraa bado ay ka mid yihiin: gabayga, geeraarka, jiiftada, masafada, baarcaddaha, buraan- burka, guurowga, badda maqasha, ta

cawska, ta haanta lagu lulo, ta kebdaha lagu sameeyo, ta mooyahaya tumo, heesaha, iwm.

Sidee loo kala garan jirey badaha maansooyinka?

Waagii hore aad bay u adkayd in qofka caadiga ihi garto waxa ay ku kala duwan yihiin. Hayeeshee, in yar oo fara-ku-tiris ah uun baa sheegi kari jirtey waxa ay ku kala duwan yihiin, ayaga oo adeegsanaya dhegta. Tusaale ahaan, haddii aan idhaa:

Waar adhi hooy waa dhallaan iyo haween

dhimiradiisiiye Haddee ragga laxaha sii dhawrayow,

dhaqasho waa geele

ama

Soddon baan tirsanayaa intuu, sahanku
laallaaye Weli saancadkii igama tegin, aan
sagootiyaye

ama

Nimankii Almadar een lahaa, odayaday

dhaami Isticmaarka nimankaan lahaa,

udubbaday saari Ingiriisba nimankaan

lahaa, orodba way dhaafin

Maxaa lagu garan karaa inuu laaxin ku jiro iyo in kale?

Qofkii aan maanso dhaadhi ahayn way ku adagtahay inuu si hawl yar u garto laaxinka iyo deelqaafka la sheegaa waxa uu yahay iyo halka ay maansada ka galaan.

Bal isku day inaad kala asoorto maansooyinkan soo socda

1. Waxan ahay qoraa
2. Walhadow faraskayga

Weedh yar oon ku ammaanay

Wowga maan ka bilaabo

3. Kumaa madaxooda, Mijaa u rogaaya?

Kala asooridda

1. Waxan ahay qoraa (Maqaleey warlaay)
2. Walhadow faraskayga

Weedh yar oon ku ammaanay

Wowga maan ka bilaabo

(Geeraar)

3. Kumaa madaxooda,

Mijaa u rogaaya? (Maroodi-maroodi)

Waxtarkii qoraalku soo kordhiyey

Qoriddii afka la qoray oo ahayd guushii u horreysey ee dadka Soomaaliyeed gaadhaan qarnigii inna dhaafay, taasi oo fududaysay inay dadka afkooda kuwada xidhiidhaan. Guusha labaad baa noqotay kolkii la helay aragtida miisaanka maansada, taasi oo iyana fududaysay in si hawl yar loo kala asooro badaha maansooyinka Soomaaliyeed, lana kala garto laaxinka iyo deelqaafku waxa ay yihiin iyo halka ay ka galaan maansada. Sidaasi awgeed bal aan ku horrayno:

I. Aragtida Gaarriye

Aragtidii u horreysey waxay soo baxday 17 Jan. 1976kii. Waxaana soo saaray Maxamed Xaashi Dhamac 'Gaarriye'. Waxaanu tirinayaa shaqallada.

Tusaale ahaan:

Dig dheh deelka maansada

1 1 2 (1)2 1 1

Tixo duriyo daabac

ah 1 1 1 1

(1) 2 1 1

Isku duubni wadareed

1 1 2 (1) 1 1 2

Ha ka dido shan xuubluhu

1 1 1 1 (1) 2 1 1

.

Badaha Maansada

In kasta oo la ogaa kala duwanaanshaha maansooyinka haddana, Gaarriye ka hor looma kala qaybin bado, lamana ogeyn inuu xidhiidh ka dhexeeyo.
Xidhiidhka ka dhexeeya badaha maansooyinka Soomaaliyeed waxa uu Gaarriye ku soo koobay Hal Murtiyeedkan hoos ku qoran ee odhanaya:

> ‘*Mar kasta oo aad shaqal soo kordhiso ama dhinto waxaad ku turun- turoonaysaa maanso cusub maxaa qurux ku jirta afkeenna*?’

Waxa kale oo uu inoo sheegay jiritaanka jiifto sagaalley iyo tobanley sida tusaalayaashan hoos ku qorani tilmaamayaan

l.(Badda) Jiiftada

1.Arrin waa la diga rogay

1 1 2 (1) 1 1 1 1 = 9

Doonyii la raran jirey

2 2 (1) 1 1 1 1 = 9

Markab baa ka daba yimid

1 1 2 (1) 1 1 1 1 = 9

Halka labada bilood ku dhexjira xundhur baa la yidhaa. Jiifto Sagaalley afarna way ka horreeyaan afarna way ka dambeeyaan. Tobanleydana shan shaqal baa ka horreeya, afarna way ka dambeeyaan.

2. Hooyooy la’aantaa

2 2 (1) 2 2

Hadal lama kareenoo

1 1 1 1 (1) 2 2

Ruux aanad habinoo

2 2 (1) 1 1 2

Kolba aanad heesiyo

1 1 2 (1) 2 1 1 = 9

Hoobay ku sabinoo

2 2 (1) 1 1 2 = 9

(Badda) Masafada

I. Muruqaagu yuu noqon

1 1 2 (1) 2 1 1 = 9

Magli dila walaalkii

1 1 1 1 (1) 2 2 = 9

Maskaxdaadu yay noqon

1 1 2 (1) 2 1 1 = 9

Maqal lagula leeyahay

1 1 1 1 (1) 2 1 1 = 9

2. Ninkii dhoof ku yimid bay

1 2 2 (1) 1 1 2 = 10

Geeridu dhibaysaa

2 1 1 (1) 2 2 = 9

Waqtigii dhammaayoo

1 1 2 (1) 2 2 = 9

Wu dhaqaaqi doonaa

1 1 2 (1) 2 2 = 9

Waxa haddaba isweydiin leh: Maxay ku kala duwan yihii Jiiftada iyo Masafadu?

U fiirso. Masafada laba tuducba gaar bay isugu jawaabayaan. Halka Jiiftadu aanay sidaasi ahayn ee dulucdeeda qormo qormo isu raacsan tahay.

I. Xidhiidhka ka dhexeeya badaha kolka jiifto hal shaqal laga jaro

I. Badda Maydhaxda:

Kolka Jiiftada hal shaqal laga jaro, waxa soo baxaysa Badda Maydhaxda tusaale ahaan:

a) Naa laagolaago

2 2 (1) 2 1 = 8

Naa laag galoola

2 2 (1) 2 1 = 8

Oon weli la diiran

2 1 1(1) 2 1 = 8

b) Waa curub abaadday

2 1 1 (1) 2 1

Waa laan cusaybah

2 2 (1) 2 1

Oo ciiro fuushay

2 2(1) 2 1

Curdin weeye qaadhay

1 1 2 (1) 2 1

Waa cudur jidh yeeshay

2 1 1 (1) 2 1

Waa baahi caga leh

2 2 (1) 1 1 1

Waa ciil dadweyne

2 2 (1) 2 1

Cunug laga sameeyey

1 1 1 1 (1) 2 1

2. Badda Maqasha:

Kolka heestii Maydhaxda hal shaqal laga jaro, waxa innoo soo baxaysa baddii Maqasha oo ah mid ku salaysan heesta maqasha lagu kaxeeyo kolka geeddiga la yahay. Tusaale ahaan:

Maqaleey warlaay

1 1 2 (1) 2 = 7

ma laguu warramay

1 1 2 (1) 1 1 = 7

In Cali la diley

1 1 1 1 (1) 2 = 7

Oo Cumar la diley

2 1 1 (1) 1 1 = 7

3. Badda Guuguulaha:

Kolka heestii Maqasha laba shaqal laga jaro, waxa innoo soo baxaysa heesta guuguulaha. Tusaale ahaan:

Guugguule

2 2 (1) = 5

Geelii dhal

2 2 (1) = 5

Adhigii dhal

1 1 2 (1) = 5

4. Badda Mooyaha

Kolka heesta guuguulaha hal shaqal laga jaro, Waxa innoo soo baxaysa heesta kolka hadhuudhka mooyaha lagu tumayo la adeegsado. Tusaale ahaan:

I. Mooyaha

2 1 1

Malablaha

1 1 1 1

Magacii?

1 1 2

Mooyaan

2 2

Tibahana

1 1 1 1

Cabban iyo

1 1 1 1

Cutiyaa

1 1 2

La yidhaa

1 1 2

2. Ubaxeey

1 1 2

Ubaxeey

1 1 2

Indho yaab

1 1 2

Badan baa

1 1 2

Kugu soo

1 1 2

Ururee

1 1 2

Maxay kaa

1 1 2

Uriyeen?

1 1 2

3. Adaga a

1 1 2

Adaga a

1 1 2

Adaga a

1 1 2

Ma bir baa

1 1 2

Ma bidaar

1 1 2

Oday baa

1 1 2

4. Ka kacaay

1 1 2

Ka kacaay

1 1 2

Kama kama

1 1 1 1

Yimiyeey

1 1 2

1 1 2

Ba ayaan

5. Wa ayaan

Kiniyuu

1 1 2

Gubayoo

1 1

2

Lay sku soo

1 1 2

Korodhyeey

1 1 2

1 1 2

Duni aa

1 1 2

Khir sabaan

1 1 2

Nin aroo

1 1 2

Sanayaa

1 1 2

Ninna iil

1 1 2

Gelayaa

1 1 2

II. Xidhiidhka ka dhexeeya badaha kolka jiifto hal shaqal lagu daro

I. Badda Haanta ama dacawada

Kolka Jiifto sagaalley ama tobanley hal shaqal lagu daro waxa innoo soo baaysa heesta haanta lagu lulo ama ta dacawada maqasha lagaga ilaaliyo. Tusaale ahaan:

a. Haanyahay qabooy qooryar

2 1 1 (1) 2 2 1

Laba qaar laguu kala jar

1 1 2 (1) 2 1 1 1

******

b. Naa hooy dayooy heedhe

2 2 (1) 2 2 1

Dayo Faaraxeey heedhe

1 1 2 (1) 2 2 1

2. Badda Cawska

Kolka heesta haanta lagu daro hal shaqal waxa innoo soo baaysa heesta cawska loo qaado kolka la samaynayo. Tusaale ahaan:

a. Cawskanow sabool diidow

2 1 1 (1) 2 2 2

Yaan suuqa lagu dhiginoon

2 2 (1) 1 1 1 1 2

Soddon lagugu baayicinoon

1 1 1 1 (1) 2 11 2

b. Soomaaliyeey toosoo

2 2 (1) 2 2 2

Toosoo isku tirsada eey

2 2 (1) 1 1 1 1 2

Hadba kiinna taag daraneey

1 1 2 (1) 2 1 1 2

Taageera weligiineey

2 2 (1) 1 1 2 2

III. kolka jiifto hal shaqal ama laba dhanka hore laga daro Heesaha waraabka

kolka jiifto hal shaqal ama laba dhanka hore laga daro, waxa inoo soo baxaysa heesta geela lagu waraabiyo. Tusaale ahaan:

A. Geelu geel fuley

2 (1) 2 1 1

Gaadhimaayee

2 (1) 2 2

Ha ka daba

fulo 1 (1)

1 1 1

1

Waana toolmoon

2 (1) 2 2

B. Waa tanoo timi

2 (1) 2 1 1

Waana teennii

2 (1) 2 2

Waanay tuban tahay

2 (1) 1 1 1 1

C. Ninna dhaqashuu

1 (1) 1 1 2

Kuugu dhabar jabay

2 (1) 1 1 1 1

Ninna dhuunuu

1 (1) 2 2

Kuu dhex joogaa

D. Hadday tuban tahay

1 (1) 1 1 1 1

Oy tol leedahay

1 (1) 2 1 1

Looma kala hadho

2 (1) 1 1 1 1

E. Qaalintaa godan 2 (1)

2 1 1

Ee golxada dheer

2 (1) 1 1 2

Soo godleydiyo

2 (1) 2 1 1

Guurahaa diley

2 (1) 2 1 1

2. Gabay

1. Ha furfurin dermada layga waa, inan fadhiistaaye

1 1 1 1 (1) 1 1 2 (1) 2 1 1 (1) 2 2 1

(Ismaaciil Mire)

Dhaaxaan jalaadee dheg baan, jalaq la ii siin dheh

2 2 (1) 2 2 (1) 2 1 1 (1) 2 2 1

(Ina Cabdalla Xasan)

2. Allow yaa darwiishkii farriin debecsan gaadhsiiya

1 1 2 (1) 2 2 (1) 2 1 1 (1) 2 2 1

Allow yaa dadkaagii yidhaa dawladnimo

qaaday Allow yaa dabbaaldegiyo farax

kala dul eedaama Fardaha yaa dirkii

dhooddimeerdoona faracdiisa Allow yaa

darmaan farataqaan duqa u heenseeya

(Qaasin)

3. Kani waa dux iyo sooryo iyo malabki doocaane

1 1 2 (1) 1 1 2 (1) 1 1 1 1(1) 2 2 1

Waa dood macaanoo nin raga lagu daweeyaaye

2 2 (1) 2 2 (1) 1 1 1 1 (1) 2 2 1

Waa gabay da’weynoo sannado dabaqu saarraaye

(Hadraawi)

Heesta Kebedda

a. Geedba geedka u dheer

2 (1) 2 1 1 2

Laga garaacyeey

1 1 (1) 2 2

Galool mudhay mullaaxdiiyeey

1 2 1 1 (1) 2 2 2

b. Sheekha Maydh yaallow

2 (1) 2 2 2

Shekh Isaxaaqow

1 1 (1) 2 2

Awoowow shar naga hay yeey

1 2 2 (1) 1 1 2 2

Aragtida Gaarriye oo si cusub loo dhigay

Haddii lagu siiyo isleegahan hoos ku qoran ee ah:

1. X + 1 = Y,

Laguna yidhaa soo saar qiimaha X, miyaan loo qori karin sidan hoos ku qoran ee ah:

2. X = Y - 1.

Haddii, aynu haddaba nidhaa X = Jiifto, Y-na = Heesta haanta, miyaan isleegta 1aad loo qori karin sida soo socota:

Jiifto$_{sa.\ ama\ tob.}$ + 1 = Heesta

haanta Isleegta 2aadna u qori Karin

sidan:

Jiifto$_{sa.\ ama\ tob.}$ = Heesta hanta - 1

Sidaa si la mid ah baa badahakalana loogu qori karaa qaabkaasi oo kale sida:

a. Jiifto$_{sa.\ ama\ tob.}$ + *2* = Heesta$_{Cawska}$

b. Jiifto$_{sa.\ ama\ tob.}$ = Heesta$_{Cawska}$ - *2*

c. Jiifto$_{sa.\ ama\ to.}$ - *1* = Heesta$_{maydhaxda}$

d. Heesta$_{maydhaxda.}$ +*1* = Jiifto$_{sa.\ ama\ to}$


e. Jiifto$_{sa.\ ama\ to.}$ - *2* = Heesta$_{maqasha}$

f. Jiifto$_{sa.\ ama\ to.}$ = Heesta$_{maqasha}$ + *2*

g. Heesta$_{maqasha}$ *- 2 = Heesta shimbiraha*

Gabayga haddii aan u fiirsanno waxaad dareemaysaa in miisaankiisu yahay miisaanka heesta haanta labanlaaban. Tusaale ahaan:

Kani waa dux iyo sooryo iyo malabki doocaane



(Heesta) Haanta (Heesta) Haanta

Sidaasi awgeed miyaan loo qorin Karin

sidan? (Heesta) Haanta + (Heesta)

Haanta = Gabay


Sidaa darteed waxaan odhan karnaa 2H = Gabay,

Halka marka qiimaha ‘H’ la soo saaray laga

qorayo sidan

H = Gabay/2

Ugu dambayntii xidhiidhkaasi ka dhexeeya badaha qaarkood baan garaaf ku muujin karnaa sida hoos ka muuqata:



3. Aragtida Carraale

Laba gu'iyo badh ka dib markii uu Gaarriye soo qoray aragtidiisa ayuu Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale' isna soo bandhigay aragti taa ka duwan oo ku salaysan shaqallada dhaadheer iyo alannada. Tusaale ahaan:

Saadaasha mooyee 5:4 Qalin baa saxeexee 6:3 Saaxiibbo adagiyo 7:2

Jidadka ay abwaannadu u maraan dhegeystayaashooda Abwaannadu kolka ay maansooyinka curinayaan dadka waxay u soo maraan 5 dareemaye ee kala ah

1. Urta - Olfactory (Sanka)

2. Dhadhanka - Gustatory (Carrabka)

3. Maqala - Aural (Dhegaha)

4. Aragga - Visual (Indhaha)

5. Taabashada - Tactile (dubka, maqaarka

I. Sanka

Hawsha guud ka sokow, sanku waa agabka dareenka urta (olfactory).. La'aantiina eraydada udgoon, qadhmuun iyo uf midna muu jireen. Waxaanu ka mid yahay jidadka ay hal-abuurradu u soo maraan dhegeystayaashooda. Tusaale ahaan

a. Dambarkiisu waydiin <u>uraa</u> waana dabataane

(Cali-Dhuux Aadan)

b. Sideedaan jaleecada

Saxansaxo udgoon

badan Sanka kuula

raacaa

Xasan-Ganey

c. Arooryada hore daruur

onkoddiyo Ufada roobku way

udgoontahay

d. Ayaan

badaneey

Ayaan

badaneey Sidii

ubaxii Udgoon

badaney

Axmed Muxumed Good ‘Shimbir’

e. *Uf qabiilka anaa leh*
Wuxuun baa ku
adeegta Nin iskii
kartidiisa Isagoon
cid ku tiirsan Isku
taagi kareynin. Una
haysta ateero
Ayaantuu dambi
geystana Laga hoos
galo eedda.
Ayid waad is
xigtaaniyo Idinkaa
isku reer iyo Aqligii
lixdankii
Maanta iib geli maayo!

Sidaan aaminsanayna
Abkuu doono ha
sheegtee Wuxuun baa
ehel ii ah Dadka kaan
af aqaanno ee Si wax
iila arkaaya ey
Na midayso ujeedo."

M.X.Dhamac (Gaarriye)

2. Carrab-ka (dhadhan/taste)

Hawsha guud ka sokow, carrabku waa agabka dareenka dhandhanka (Gustatory). La’aantiina eraydada macaan, qa-dhaadh iyo dhanaan midna muu jireen. Waxaanu ka mid yahay jidadka ay hal-abuurradu u soo maraan dhegeys-tayaashooda. Tusaale ahaan:

a. Walaal inuu macaan yahay Ninkii madiyahaa baa og

b. Dacartuba mar bay malab dhashaa, muudsataa
dhabaqe Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh,
meel u wada yaalle

(Axmed Ismaaciil Diiriye ‘Qaasin’)

3. Dhego-aha (Maqal/Aural):

Fiin yahay adaa ololay oo oohin ciirsadaye

Maxaad aragtay waan kula qabaa uurku

taallada e

(Cali Xuseen Xirsi)

Diigyohow ciyayaa dantay ma

dhowee Malaha waaba

daakiraaddii!

(Barkhadcas)

4. Indho-aha (Arag/Visual):

Sidii cirku hooray meel cosobloo

Cadceeddu u soobbaxdaad

tahay!

5. Maqaarka (Taabasho/Tactile):

Jilbis halaqa iyo good waxaan jaanta kala

boodey Wixii aan ku joogsaday abees jidhif

leh oo duuban Jid abaar ah oo kulul waxaan

hilib ku jeellaaday!

(Maxamed
Cabdalla.Xasan

Xidhiidhka ka dhexeeya heesaha wiglo, hirwo, dhaanto, iyo heello

I. wiglo:

Hadduu ballankii dhab kaa yahay

(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 = 12

Biyaan jirin been ku soo sheeg

(1) 2 1 1 2 (1) 2 2 = 12

2. Hirwo

Hadduu ballankii dhab kaa yahayeey

(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 2 = 14

Biyaan jirin been ku soo sheegeey

(1) 2 1 1 2 (1) 2 2 2 = 14

3. Dhaanto

Naa hadduu ballankii dhab kaa yahayeey

2 (1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 2 = 16

Hooy biyaan jirin been ku soo sheegeey

2 (1) 2 1 1 2 (1) 2 2 2 = 16

4. Heello

Waxaan ahay ruux la kala jarayoo

(1) 2 1 1 2 (1) 1 1 1 1 2 = 14

Jabbuutiyo Jawhar kala yaal

(1) 2 1 1 2 (1) 1 1 2 = 12

(Faysal Cumar Mushteeg)

Hibooy amba waan ku
haybinayee

(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 2 = 14

Inaabti ma ii han weyntahay?

(1) 2 1 1 2 (1) 2 1 1 = 12

(Cali Sugulle Dun-Carbeed)

Hummaagyada iyo sida ay hal-abuurradu u adeegsadaan

I. Ekeeye : *Simile*

- Waxa la adeegsadaa kolka la xidhiidhinayo laba hummaag, iyada oo la adeegsanayo qalabyada ekeeyaha

Qalabyada Ekeeyaha

- *Sida,*
- *la mid ah,*
- *la moodaa,*
- *u eg,*
- *geddiisii,*
- *kala e.*

Tiirarka Ekeeyaha

1. U eke
2. Loo eke
3. Qalab
4. Qaab

Tusaale:

Dhulku waa sida kubbadda

u eke qaab qalab loo

eke Biyaha baddu waa

sida cirka

Biyaha badda midabkoodu waa sida cirka

- Abaar gaag-ma-reebaa dhacdiyo
  gaatamoo kala e (Ismaaciil
  Mire)
- Indhoolaha ay agtiisa
  martaa siduu
  arkayuu u eegaa!
- Sidii yeyda hawd horow ma
  ledoo ilbaan ka hurdaa
  habeenkii!
- Lagu mood dhirtii
  maacaleesh midhihi
  saarraaye

2.Shareeraha (Metaphor)

- Waxa la midaynayaa labada hummaag. Waxaana meesha ka baxay qalabkii ekeeyaha.

Jaamac waa libaax

Jaamac waa <u>sida</u> libaaxa (ekeeye)

3. Xuska (Allegory)

Abwaanku wuxu adeegsanayaa sheeko dhaqameed ama dhacdo dhacday oo uu ku soo koobayaa dhawr tuduc isaga oo xidhiidh ka dhexeysiinaya dhacdaa iyo waxa immika jooga. Tusaale ahaan

Haw dhuran dhurwaagii laftuu, dhuuxay eersadaye

(A.I. Diiriye ‘Qaasin’)

Qofayn (Personification)

- Xoolaha ayaad, sidii qof oo kale, ka dhigeysaa wax hadlaya, ama guud ahaan waxaan dad ahayn baad qof oo kale ka dhigeysaa ood leedahay isagaa yidhi.

Tusaale :

Libaax baa hadloo yidhi, “ Bal waxaan ninkaa ku sameeyo

eeg.” Dacawadii reerka yeesha ka cuntay baa tidhi:

“Wallee reer aan ogahay ma guuro.”

Sillansugan (Paradox)

- Wuxuu adeegsadaa qalabkaasu isaseegga ka dhexeeya laba hummaag.

Waa wax sillan oo haddana sugan.

- Waxaa jira wax xaaraan ah hayeeshee duruuf gaarihi xalaal ka dhigayso. Tusaale ahaan, waxa caado ah in qofka cawradiisu asturnaato. Waxaase lagu odhanayaa: hadday foolitimaad gudo- qarsiimo hadhay!

Sarbeebta

Waa qalabka hal-xidhaalayaasha laga sameeyo sida googgaalaysiga iwm. Tusaale ahaan, waxa la yidhaa afar hablood reer u soo heermeen.

Markaasaa hilib kulul loo keenay. Aqalka dushiisana waa laga dhegeysanayaa.

1. Tii u horreysaa hadashoo tidhi:

Kululaa kululaa kama naallee!

2. Tii labaadna waxay tidhi:

Ha kafoofee korka saar!

3. Tii saddexaadna waxay tidhi:

Kaadsanmaynee kala goo!

4. Middii afraadna waxay tidhi:

Ha qaboobee qabaweyn ku rid!

Waxa la yidhi waxa la guursaday tii tidhi, “ *Ha kafoofee korka saar!*” Waxa inantaa ka muuqata ayaa la yidhi dulqaad.

Raadraac

B. W. Andarawiski and 1M Liwis, Somali poetry: an introduction, 1964

Cabdillaahi Diiriye Guuleed 'Carraale', Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, 2004, Sweden

(), "Hawraarey Ninba Si Kuu Qaaday," *Xiddigta Oktoobar* 6:119 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 10 June, 1978): 3.

−−−, "Hawraarey Ninba Si Kuu Qaaday: Qabta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 120 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 11 June, 1978): 3.

−−−, "Gabaygeenna Miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6)26 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information national Guidance, 18 June, 1978): 3.

———, "Gabaygeenna Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:134 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 28 June, 1978): 3.

———, "Jiiftadana Miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6:149 (Mogadishu,' Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 16 July, 1978): 3.

———, "Jiiftadana Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:150 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 17 July, 1978): 3.

———, "Dhaantadana Miisaan,"*Xiddigta Oktoobar* 6:164 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information national Guidance, 2 August, 1978): 3. [For the second half of this article, see under "Suugaanta Soomaaliyeed.

———, "Suugaanta Soomaaliyeed: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:165 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 3 August, 1978): 3. [For the first half of this article, see under' 'Dhaantadana Miisaan. "

———, "Heelladana miisaan," *Xiddigta Oktoobar* 6:172 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 12 August, 1978): 3.

———, "Heelladana Miisaan: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6:173 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 13 August, 1978): 3.

———, "Geeraarka iyo Miisaankiisa," *Xiddigta Oktoobar* 6: 190 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National.Guidance, 2 September, 1978): 3.

———, "Geeraarka iyo Miisaankiisa: Qaybta Labaad," *Xiddigta Oktoobar* 6: 191 Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 3 September, 1978): 3.

———, "Buraanburka iyo Miisaanki.isa,"*Xiddigta Oktoobar* 6:247 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Information and National Guidance, 8 November, 1978): 3. [For the second half of this article, see under "Hojis iyo Hooris Buraanbur.

———, "Hojis iyo Hooris Buraanbur," *Xiddigta Oktoobar* 6:248 (Mogadishu, Somalia: Ministry ofInformation and National Guidance, 9 November, 1978): 3. [For the first half of this article, seeunder "Buraanbur iyo Miisaankiisa."

———, *Gorfaynta Maansada [Analysis of Poetry]* (Mogadishu, Somalia: Academy of Culture, Ministry of Higher Education and Culture). [forthcoming]

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Kumaa ah aabbaha miisaanka maansada Soomaaliyeed? Ma Carraale mise Gaarriye? 2006, Dhaxalreeb 3 www.redsea−online.com

———,Abwaan cusub oo af Soomaali iyo af Ingiriisiya/ a modern Somali−English dictionary. Printed by Ottawa Roman Catholic Separate School Board, 1995, Ottawa.

———, Magac bilaash uma baxo: ujeeddooyinka magacyada iyo naanaysaha Soomaaliyeed, by the Author in 1998, Ottawa.

———, Xasilloonidarrada af Soomaaliga, Hal−aqoon, Xidhmada IIaad, tirsiga 1aad, iyo 2aad, 2002/ Vol.II, No.1,&2, 2002.

———,Gorfaynta qaamuuska cusub ee af Soomaaliga, Hal−aqoon, Xidhmada IVaad & Vaad, tirsiga 1aad,2aad,3aad 2004−2005/ Vol.IV&V, No.1,2,&3 2004−2005.

———,Hal−bixinta ereyada kumbuyuutarka

Campell, Lyle,Historical Linguistics: An Introduction. The MIT Press.

John W. Johnson '*Heello*', *Heellooy Heellallooy,* 1974,

————−, ‘Somali Prosodic System’ Horn of Africa Volume 2, No.3 pp. 46−54.

Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi), Hal−karaan, Den Norske Somaliakomiteen, 1993, Norway.

Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye), Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 17 January, 1976): 3.

———"Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:2 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 24 January, 1976): 3.

———, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:8 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 31 January, 1976): 3.

———, "Toddobadkan iyo Suugaanta: Miisanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:14 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 7 February, 1976): 3.

———, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:20 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 14 February, 1976): 3.

———, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:55 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 27 March, 1976): 3.

———, "Toodobadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:73 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 17 April, 1976): 3.

———, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:86 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 3 May, 1976): 3.

———, "Toddobaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4:90 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and National Guidance, 8 May, 1976): 3.

——— ,"Toodbaadkan iyo Suugaanta: Miisaanka Maansada," *Xiddigta Oktoobar* 4: 108 (Mogadishu, Somalia: Ministry of Infonnation and N~,inn~1 Guidance. 29 Mav. 1976): 3.

Cajalad maqal iyo muuqaal ah oo Gaarriye lagaga duubay magaalada Abidjaan ee dalka Ivory Coast,

Cajalado maqal ah oo uu Gaarriye duubay .